# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:18 AM** **Hansard No.22/9** **Kal-fadhiga 22aad**

**Fadhiyadii 19,20,21 iyo 22aad** ***17,18,21,22/09/2013***

## Dooda Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka oo Socotey 4 maalmood kana qeyb-qaateen 38 Mudane

1. **Md Ibraahim Axmed Reygal:-** Gudoomiye iyo Goleweynaha waan salamayaa anuu waxaan soo jeedinayaa marka hore xeerkan qodonkiisa

   **Qodobka 10aad** Dacwadaha iyo Ciqaabta Iyada oo habka dacwad qaadista loo raacayo xeerarka habka meddaniga iyo ciqaabta, ciqaabaha lagu mutaysan karo jabinta xeerka waxaa loo raacayaa ciqaabaha ku xusan, Title III ee The **body of laws on Direct Taxation**. Qof kasta oo jabiya qodobada Xeerka waxaa lagu ciqaabaya, ciqaabaha ku xusan: **Title V**, ee xeerka **the body of laws on Direct Taxation** iyo xeerarka kale ee khuseeya, Kalmadaha ku qoran ee ingiriisiga ah waa ta koobaade mee Xeerkii laga soo naqliyay.

   In wadooyinka la-hagaajiyaa waa lagama maarmaan waayo waa kaabe-dhaqaale oo muhiim ah, Hadaba dhaqaalaha hawshaas lagu qabanayaa ma aha cashuur cusub oo la saaro xoolaha iyo gaadiidka waayo waxay keeni kartaa tartanka suuqyada oo xooleheena lagaga dheereeyo, Xoolaha oo dekedaha kale ee mandaqada u wareega iyo Maciishada oo qofka caadiga ah ee wax iibsanaya kor ugu kacda hase yeeshee kharashyada wadooyinka lagu horumarinayaa waxay ka imankaraan:-

   - qaadka
   - Sigaarka
   - walxaha la iskuqurxiyo
   - xawaaladaha
   - Isgaadhsiintaiyotabarucaad
   - gaadiidkaRaaxada

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Ha'ayadu waxaan u arkaa in ay madaxbanaanaato Xeerka lagu abuurayona marka hore la ansixiyo intaan cashuur loo waajibin

islamarkaana kharashkeedu ka mid noqdo Miisaaniyad sanadeedka.

2. **Md. Cali X. Maxamed Muuse:-** Waa marka hore, dalku cashuuro in la qaado waa uu baahan yahay, tusaale ahaan hadii aan soo qaadano Baabuurta Dekada ka soo degta waa la cashuuraa, markuu magaalooyinka soo galena waxaa laga qaadaa cashuur 6 biloodba mar, baabuurta maanta dalkeena joogtaa waxay kor u dhaafayaa 52 kun hadii labadaa cashuurood la is barbar dhigo musuqmaasuqa ayaa badanaya wakhtiguna waa uu ka dhacayaa oo ka ma gaadhsiin karaan ururinta cashuurta.

   Markaa waxaan leeyahay hadii la doonayo daabaqaada adhiga ama baabuurta wadooyinka wax lagu daro waan in ay Wasaarada Maaliyadu ay la wareegtaa oo ay ku kordhiso wixii ay ku kordhin karayaan lakiin labadan Wasaaradood ee is garab socda ee laba maaliyadood ah meesha halaga saaro.

   **Waxaan leeyahay:-**

   - Halaga daayo shacbigu ma qaadi karayaane halaga daayo oo sidii hore halagu wado ayaan odhan lahaa.

3. **Md. Saleebaan Yuusuf Cali koore:-** Waxaan rabaa in aan dul istaago dhawr qodob oo aan is leeyahay waxay dan u yihiin dalka iyo dadka,

   Markaa hadii aan isku dayo in aan inyar faah-faahin ka bixiyo marka laga hadlaayo dawladaha caalamka waxaa ugu mihiimsan in dalku uu yeesho siyaasad dhaqaale oo lagu kobcinaayo dadka ganacsatada ah ee wax dhoofiya, ma jirto dawlad caalamka jirta oo dadkeeda wax dhoofiya ku kordhisa cashuur aanay dadku qaadi Karin, xoolaha Somaliland waxay ka kala yimaadaan dhinacyo kala duwan waxaana la yidhaa 78% dadku waxay ku tiirsa san yihiin xoolaha nool si toos ah iyo si dadbanba taasina waxay ku tusaysaa muhiimada ay ugu fadhido xoolaha nool oo ah waxaa kaliya ee aad u leenahay calaamad ahaan waana raad sii jireena ilaa boqolaal sano.

   Waxaan leeyahay marka ugu horaysa xooluhu waa jaran-jarooyin ay dad badani isaga daba macaashaan marka laga soo bilaabo guriga uu ku dhasho ilaa dakada marka Markabka la saarayo ilaa dhawr iyo labaatan qof ayaa qofba qof kadaba macaashaa sidaa daraadeed siyaasadii caalami ahayd way ka hor imanaysaa taasi tii daakhiliga ahay ee dadku ku noolaana way ka hor imanaysaa in xashuur la saaro xoolaha maraa qofkii wax garanaya ee aqliga leh ee u naxaya dalku ma odhan karo xoolo halagu kordhiyo cashuur.

   Waan qabaa in wadooyinka dalka la sameeyo marka aan ka hadlo baabuurta waaweyn ee transportation ka ah waa kuwa kaliya ee uu dalku haysto markaa hadii gaadhiga cashuur badan lagu soo rogo waxaa uu ka jaranayaa islaanta diifta iyo gaajada la ildaran ee ma taabanayso dadka ladan, baabuurta laftoodu

ma haystaan xamuul ku filan oo ay ku dabaraan nolol maal meedkooda taasina waxay dhawaan ku tahay in ay bulshadu adhaxda ay ka jabayso gaadhiga wayn ee inta uu Barbara ka boxo ee soconaayay 700km oo qaadayay xamuulka ee inta uu sii socdo ee uu rafaad galayo hadana ha layidhaa cashuur hala saaro caqli meesha ma jiro oo ma garan.

Waxaan is dul taagayaa wadooyinka oo la yidhaa kaabayaasha dhaqaalaha waana meelaha ugu mihiimsan ee dal mar ka uu korayo waxaana meelaha ay umadu isugu xidhmaan ee loo kala ganacsado ee ay isugu gudbaan waana run lakiin side iyo qaabkee ayaa loo horumarinayaa wadooyinka hadii aan runta ka hadalno waxay baahan yihiin lacag qayro caadiya oo lagu horumariyo oo aanu qaadi karin neefka adhiga ah ee intaa kolba meel cashuurta laga qaadayo uu san qaadi karin ayu u baahan yahay.

Dalaka afrika oo dhan waxaa lagu taageeraa hanti farahel badan ama deeq ha ku helaan ama meel kale ka helaane, marka aam ka hadlayno wadada Ceeri gaaabo waa 360km international standard ku waa 1 milyan dollar, markaa waxay u baahan tahay 360 milyan oo dollar ayay u baahan tahay markaa side ayay suura gal u tahay iyada oo aan loo hayn lacag dayn ah oo inooga timiday caalamka taasina waxaan rumaysanayno maahan

Ta afraad marka aan is dul taago dhanka kale waar lacagtan la saarayo adhiga iyo baabuurta waawayn marka aaan si caadiya u hadlaayo waar gaadhiga yare e aan wato oo kale hala saaro ayaan leeyahay cashuurta waxaa jira intaa oo tenmitir ayaynu haysanaa oo dalka hanti ka badani ay ka soo baxdo oo ay ugu horayso is gaadhsiinta, xawaladaha, electronicska, cosmatics ku waar marka Qaranka laga fikiraayo waxaa laga fikiraa waxa qorka muwaadinka ah taabana, waar ninka dhalada cadarka ah gadanaya ee siisanaya $100 hadii $10 dollar ama $5 dollar la saaro ninka moobilka $1200 dollar hadaan saaro $50 dollar maxaa ii diidaya?

Maxaa inoo diiday wax yaaba aan taabanayn nolosha dadka in la saaro cashuurta maxaa diidaya in aan saarno Sigaarka iyo Jaadka maxaa inoo diidaya? Lacago badan oo ah milyanis and milyanis ah ayaa waxyaabahaa lagu kharash gareeyaa markaa waxaa leeyahay hadii umada laga naxaayo hala saaro cashuurta, xildhibaanadana dad ayaa soo doortay oo wax ka sugaaya oo waa in ay la xisaabtamaan xukuumada oo waxay u yihiin accountibility xukuumada, markaa dadkii codkooda siiyay ee ma saakiinta ahaa in ay u naxi waayaan waa mid aan wanaag sanayn, Waxaana loo baahan yahay in ay dawladu ka noxdo dadkeeda oo ay u naxariisato ayaa loo bahan yahay.

**Waxaan ku soo gabaganbaynayaa:-**

- Xildhibaanadu dadka hortiisiina waad joogtaan dadkii idin soo doortayna ma qaadi karaan cashuurtaa, waxaana odhan lahaa cashuurta hala saaro meelha aan soo sheegay, waad mahad san tihiin dhamaantiin.

4. **Md. Maxamed Cismaan Bulqaas:-** Sanadkii dhoweyd ee ina dhaafay EU waxay samaysay lacag malaayiin Dollar gaadhaysa oo ay ugu talo gashay wixii haruumarin ah waxaanay la noqotay markii Hay'adii la baabiiyey ee Madaxtooyada la hoos geeyey waxaanay u wareejisey Puntland oo ay ka hawl gelisey iyadoo sabab uga dhigaysa inay Hay'adii madaxa banaanayd ay mesha ka baxday sidaa darteed waxaa loo baahanyahay in Hay'adaasi madax banaanaato si ay Hay'adaha donors ka ahi  ee deeqaha bixiya qarashaad inoo siiyaan.

   Xeerkani waa mid ku culus bulshada macquulna maaha in bulshada  culays lagu saaro wasaaraduna xaq uma laha inay Xeerka soo diyaar sato waxay ahayd in Wasaarada Maaliyadu shaqadeeda qabsato, seeda kale Guddida Arimaha Bulshadu xaq umay lahayn inay soo gudbiso Xeerkan waxaa xaq u leh Guddida Dhaqaalaha sida sharcigeenu sheegayo .

   Waxaan aad usoo dhoweynayaa wadda isku xidha Ceerigaabo iyo Burco ee Madaxweynuhu uu dhagax dhigay maadaama ay Ceerigaabo tahay meeshii layga soo doortay laakiin waxaa is weydiin leh qaabka ay wadadu u dhismayso waxan odhan lahaa waxyaalaha aan loo baahnayn qarash lagu daro sida Sigaarka iyo Qaadka.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In Hay'adan haruumarinta wadooyinka laga saaro oo loo madaxbanaaneeyo hawleheeda lagana saaro Madaxtooyada.

5. **Md. Saleebaan Cawed Cali:-** Waxaa mudan in la eego rayiga uu Goluhu ka qabo Takaaliiftan Golaha la keenay waa fiicantahay laakiin waxaa muhiim ah in aan la siyaasadayn , waxaa hubaal ah in maanta baahi loo qabo oo wadooin in la helaa lagama maarmaan tahay gaadiidka waaweyni waa kii wadooyinka isticmaalayey iyaga ayaana loo danaynayaa , hadii wado fiican la helo wax waliba way sahlanaalayaan waxaan leeyahay wadooyinka shalay wuxuu Madaxweynuhu dhagax dhigay wadadii Ceerigaabo iyo Burco isku xidhaysay, cashuurtanina culays weyn ma keeneyso waxaan ku taageersanahay Xil: Saleebaan Bulqaas in waxyaabaha aan aadka loogu baahnayn sida Cosmetics, Qaadka, Sigaarka waxyaalahaas la saaro Cashuur dheeraad ah.

**waxaan soo jeedinayaa:-**

- Cashuurta hala bixiyo Xeerkana hala sii daayo maslaxad ayaa ku jirta dalka iyo dadkaba ugu jirta yaan la siyaasadayn.

6. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Waxaan is weydiinayaa horta waddo maw baahanahay?jawaabtu waxaa weeyaan horta wado waa loo baahanyahay runtii aadbaan u soo dhoweynayaa wadada Ceerigaabo ee shalay Madaxweynuhu dhagaxa dhigay waanu ku hanbalyaynaynaa Madaxweynaha waxa weeye wadadaasu waa mid loo baahnaa Gobolka Sanaagna wuu u baahnaa wadadaas.

   Cashuurahan la kordhiyey runtii way jiraan qaar dhibaato wadanka ku ah laakiin maxaa keenay sababta keentay waxaa weeye dadku hadaanay wax qabsan oo iyagu dadaal samayn cidina wax kuu qaban mayso dadaalkuna aduu kugu xidhanyahay markaad adigu hawshaada bilaabatid caalamku wuu ku caawinayaa waan la qabaa fekerkaa in cashuuraha lagu kordhiyo waxyaalaha qaadka iyo Sigaarka oo kale, waxaan leeyahay Xeerkani waa mid loo baahanyahay aadbaan usoo dhoweynayaa, halkan neefka adhiga ah 4,500 waxaan la qabaa sidaa gudidu markii hore usoo dhigtay ee 4.5 waxaan leeyahay Xeerkani waa waamid muhiim ah **waxaanan soo jeedinayaa in la ansixiyo.**

7. **Md. Maxamed Xuseen X Ciise:-** Xeerkan ina horyaala ee ah Xeerka Takaaliifta ee la leeyahay wadooyinka ayaa lagu samayn doonaa anigu waxaan leeyahay marka Xeer noocan oo kale ah laga hadlaayo waxay tahay in la eego mabaadii waaweyn, mabaadiidaa waxa weeyaan horta ma loo baahanyahay waddoyin Socodka iyo Dhaqaalaha kordhiya waa loo baahanyahay kaasi waa mid.

   In la ilaaliyo danta iyo maslaxada reer Somaliland na waa loo baahanyahay waxaan uga jeedaa Somaliland waxay dhoofisaa Xoolaha nool, marka Xoolaha la eego neefka xoolaha ah ee Berbera laga dhoofiyaa waa inuu noqdaa neef la tartami kara Xoolaha Dekedaha kale laga dhoofiyo ee Sucuudiga iyo carabaha la geynaayo, waxaan maqnaa cabasho odhanaysa **neefku Somaliland maanta wuxuu ku dhowyahay neefkii suudaaniga ahaa**, neefka suudaaniga ahi wuu ka miisaan weynahay ka Somaliland laakiin keenu qiimaha jabnida iyo dhadhanka ayuu kaga fiicanyahay markaa waxa haboon in la eego maslaxadii iyo wixii qiimaha xoolaha culays saaraya in la eegaa waa mab'da kale weeye, labadaas markay isu keen taagantahay waa in aynu kala dooranaa keebaa la qaadanayaa, taas markaan eego waxaan leeyahay dadkii Xoolaha ka shaqaynaayey ee hadhoow culaysku fuulaayo iyaga horta Goluhu waa inuu

waraystaa ama guddi loo saaro hadii ay macquul noqoto waa in lagu daraa hadii kalena laga daayaa.

**Hadii aan ku daro kani ma xalka keliya ee aan wadooyin ku dhisan karaynaabaa?** Taasna in lays weydiiyaa weeyaan , hadii ay xalka qudha tahay waynu ka fekeraynaa, wadooyinka waxaa inoo taageeri jirey wadamada reer Yurub bal iyagiina aan eegno iyagii miyaa laga quustayo ma inaga qudhay inagusoo baxsatay hadaan laga quusan waa inaan raadinaa jid kale oo aan culayska xoolaheena kaga yarayno, markaa mudanayaal waxaan leeyahay xukuumadu 2013 miisanaya way ugu jirtey lacag fara badani horuumarinta wadooyinka tan maantana kumay jirin markaa Xukuumadu waa in ay siyaasadeeda raacdaa**, Baabuurta waa la saari karaa Cashuurta sax weeyaan**, hadii maanta laga qaado 30,000 oo baabuur cashuurta waxay noqonaysaa lacag malaayiin ku dhow.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- Intaan Xeerkan gacanta loo taagin waa in laga fekeraa saamaynta ay ku yeelanayso neefkeenaa Xoolaha ah, waxaan kale leeyahay Hay'adii wadooyinka waa in dib loo eegaa madaxbanaanideedii.

8. **Md. Baara Siciid Faarax:-** waxaan aad ula yaabanahay waxaan u malaynayaa inaaneyn war u hayn dadku waxay ku noolyihiin iyo xaalada dalka ka jirta, inagu lacag baynu qaadanaa, Wasiiraduna lacag bay qaataan, Ciidamada iyo shaqaalaha dawlada malaha waxa haysta war uma hayno.

Waxaa nasiib daro ah neefkii Xoolaha ahaa oo awalba abaaro iyo biyo la'aantu heshay ee Gawaadhida biyaha loogu dhaaminayay ee marka la soo qabto in la iibiyo kharashkiisa aynu ka warhaynay, anigu sayladaha ayaan tagaa oo hooyan ahay idinku ma tagtaane, Neefka marka la soo taago lacag baa la qaadaa oo dawlada hoose ayaa qaadata, marka la qalona lacag baa laga qaadaa, Degmada laga soo rarona lacag cashuuraa laga qaadaa, iyadoo waxaas oo dhan jiraan waa nasiib daro, waxa moodaa inaynaan u nahayn dadkeena.

Haday wadooyin dhisanayno way wanaagsantahay, waan wax fiican oo loo bahan yahay.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan sheegayaa meelaha aynu lacagta galineyno, waxaa la ina siiyay lacag Caawimo ah oo wadooyinka lagu dhisayo ee ha lagu dhiso wadda Ceergaabo, Wada marista la qaado, Lacagta Liisamada Buugta, Macaasha la qaadona ha lagu daro, Waxaan kaloo ogolahay anigoo XIldhibaan

labada Sanadood ee Wada Ceergaabo soconeyso la iga gooyo laba boqol oo xldhbaan walbana ku deeqo, Wasiiraduna wayba iga lacag badanyihiine 2 sandood iyana laba boqol lacag ah laga jaro, Xawaaladaha sidoo kale labadaa sano lacag laga qaado, qaadka iyo Sigaarkana Cashurta lagu kordhiyo labadaa sanadood, Wadda Ceergaabo iska daaye wadooyinka dalkoo dhan bay dhiseysaa hadii intaan sheegay la saaro.

Wuxuu igu yidhi wasiir xirsi markuu halkan fadhiyey anagu lacagta dad danyara saarimeynee gawaadhidaan saareynaa, gawaadhida waxaa kireysta tijaarta iyana waxay saareysaa dadka danyarta ah, waxaanu jaar nahay dad secondary caruurtoodu dhameysay wuxuu jaamacad ku geeyo bay waayeen, waxaa jira 15 hay'addood oo madaxweyne aad magacowday oo waxay qabtaan aanay jirin oo hay'adda qurbo joogta iyo wax noocas ah, hay;addahaas aan waxba inoo qaban lacagta la siiyo ku kab Madaxweyne dhismaha Wadooyinka, oo lacagtaa adhiga iyo dadka la saarayo ha laga daayo.

**Waxaan ku soo gunaanadayaa:-**

- Goluhu ha u tudho dadkooda oo ha laga daayo dhibta iyo tacadiga la saarayo ee aanay qaadi Karin

9. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Aw-xoog):-** Xeerkan waan soo akhriyey waa mid diciifa oo lagu kordhinaayo cashuur uun, Cashuurtaas oo aan la garayn wakhtigeeda iyo ilaa inta ay soconayso, Xeerka magaciisa waxaa layidhaahdaa Xeerka haruumarinta wadooyinka, anigu waxan Xeerkan u bixin lahaa Xeerka Miskiin ayaa Misko la fuulo leh shaki kuma jiro in dalku u baahanyahay in loo sameeyo wadooyin lacag lagu sameeyona loo baahanyahay haseyeeshee waxaa ka horeeya weelka lagu ridayaa lacagtaa ma xalaalbaa mise waa xaaraan? Kaas oo ah Hay'ada Haruumarinta Wadooyinka, waayo Hay'adaa sharcigeeda lama samayn mana madax banaana markaa waxaa loo baahanyahay laba arimood oo kala ah:-

in Hay'ada Haruumarinta wadooyinka la xalaaleeyo oo Golahani sharci u sameeyo iyo in la sameeyo Hay'ad wadooyin (Road Authority) oo si dhaba u madax banaan, si loo helo lacagta malaayiinka dollar ah ee qaadhaan bixiyayaasha sida EU, oo shardiga ay deeqdooda ku xidheen uu yahay madaxbanaanida Hay'ada haruumarinta wadooyinka waana in Xeerkan dib loo dhigaa oo aan la ansixin inta la helaayo labadaas arimood een sare kusoo sheegay.

Xeerkani wuxuu si toosa uga hor imanayaa qodobada 14aad, 33aad iyo 34aad ee Dastuurka JSL sidaa darteed Xeer ka hor imanaya Dastuurka isla markaana Takaaliif iyo Cashuur aan ku jirin Miisaaniyada jidaynaya waa Xaaraan in la ansixiyo, hadii

aynu isla garanay in loo baahanyahay lacag wadooyinka lagu dhiso xagee lacagtaas laga doonayaa? Waxaa la saarayaa iyadoo miisaaniyada lagusoo daray Shirkadaha Xawaaladaha, Shirkadaha Isgaadhsiinta, Shirkadaha Dhismayaasha iyo Qaadka, Sigaarka, Cosmatecs iyo Electronics ka, hadii laga baqo shirkadaha waaweyn waa in loo bedelaa hab qaadhaan oo la sameeyo Guddida Qaadhaanka haruumarinta Wadooyinka arinkaa qaadhaanka ma barbar socon doondo cashuur laga qaado Xoolaha iyo Gaadiidka sidii uu shalay soo jeediyey Guddoomiye kijaandhe , markaa hadii aynu guddidaas samayno cashuur la uruurin maayo.

Markaa dadweynaha reer Somaliland ee la taacalaya nolol maalmeedkooda oo ay dilootey shaqo la'aan baahsan, sixir barar, Cashuuro iyo takaaliif hore looga qaaday arinkaa oo ku kaliifay in dhalinyaradii reer Somaliland ay miciin bidaan Tahriib ay lama degaanka ku madhaan ama ku le'daan, hay'ada wadooyinka waxay ka heshaa dhawr meelood, mudanayaal Wasiiro hore oo lacago gaar ah ay qaadaan wasaaradoodu ayaa jira oo aan u Xisaabsanayn Dawlada oo meel ay marayaan aan laga warhayn iyagoo sabab ka dhigtay nabad-gelyada.

Waxayna ay arintaasi dhiiri gelisay inay wasarad waliba tidhaahdo halaysameeyo Miisaaniyad gaar ah maantana waatan la doonayo in laf dhabarta dhaqaalaha Somaliland ee Xoolaha in la saaro culays, mudanayaal la yaabi maayo bisha soo socota hadii Wasaarado kale ay soo samaystaan Miisaaniyad hadii Golahani sidii fududayd ee duuduubka ahayd u ansixiyaan Xeerkan.

Cilmiga dhaqaalaha iyo caqliga saliimka ahi midna ma sheegayo in Cashuur la saaro badeecadaaha debeda loo dhoofiyo, Cashuurtan la leeyahay waxaa lagu haruumarinayaa wadooyin waxaan ka baqayaa inay marto halkii labadii dollar ee Gobolada bari martay, ee meelay jaan iyo cidhib dhigtay aanu golahani u war hayn, Mudane Cali Sandule qaylo dhaan ayuu ka keenay dib u dhaca weyn ee ka jira Gobolada bariga taas ayaa markhaati ka ah, tani waxaa ay sababaysaa in dadka ka ganacsada xooluhu ay u yaacaan dekedaha kale oo albaabada loo laabo dekeda Caalamiga ah ee Berbera.

Waxaan soo jeedinayaa in aan Xeerkan loo codayn codna la gelin, In dadweynaha Xeerkani sida tooska ah u taabanayo waxlaga weydiiyo sidii mudanihii iga horeeyey sheegay, In la sameeyo Hay'ada si dhab ah u madax banaan oo ka shaqaysa wadooyinka iyadoo loo samaynaayo sharci gaolahana laga ansixinaayo, Wixii takaaliif ah ee laga qaadayo dadweynaha waa in lagusoo daro miisaaniyada Qaranka Golahana ay usoo gudbiso Wasaarada Maaliyadu sida ku cad qodobada Dastuurka 54aad, 53aad iyo 55aad waa in Golaha looga yeedho Wasiirka Maaliyada si wax looga weydiiyo Cashuurtan culayska dhaqaale kusoo kordhinaysa dadweynaha ee aan ku soo aroorin Miisaaniyada lana faro Wasiirka Maaliyada inuu kusoo daro Miisaaniyada.

labaatanka dollar ee maanta laga qaado Xoolaha way ku culustahay waa in badan dib loogu xoolaha oo loo sameeyo Seerayaal, Biyo xidheeno in caafimaadka Xoolaha laga shaqeeyo.

Waxaan dadweynaha reer Somaliland ugu baaqayaa in qof waliba uu la hadlo Xildhibaankii uu soo doortay kana codsado inaanu  u codayn Xeerkan.

10. **Md. Siciid Cartan Faarax:-** dhamaan waad salaamantihiin hadaan Xeerka u gudbo, marka waajibaad qaran inoo taalo iyo marka danta shicib tagantahay inaynu cod dheer ku qeylino ayaa muhiim ah, Xeerkani waa mid aan u daneynayn danta dadka shicibka ah, ma diidanin in waddo la sameeyo oo Waddooyinku waa laf-dhabarta baahiyaha asaasiga ah oo isku xidha dadka iyo kaabayaasha Dhaqaalah dhaqaalaha ugu mihiimsan.

Iminka xeerkan ayaa la inoo soo gudbiyay, war waxaan idiin sheegayaa Berbera oo dhaqaalaha la isticmaalo 95% ka soo baxo ayaa laba boqol oo shidaala ah oo lagu kabo warshadaa Madaxweynaha u hortaaganahay maalin walba 3 bilood, Maalin walbana waxaa la inoo soo gudbinayaa Xeer yar oo caynkaas ah oo wax nuxura aan xambaarsaneyn.

Xeer maahee waa tacriifad, hadaan marka tacriifadaa u gudbo Xooluhu maalinba maalinta ka dambeysa cadaadis iyo cashuur la kordhiyo ayaa la saarayaa, iminka waxaa la saaraa oo laga qaadaa, adhiga waxa laga qaadaa $3 max jarka marka la keeno lo'duna waa $14 geelana $19 ayaa laga qaadaa, Markaa ilaa 1993kii ayaynu Xoolaha nool wax saareynay.

Wada Ceergaabo iyo Wadooyinka la dhisayo aad baan u soo dhoweynaynaa hase yeeshee Xoolaha Nool ma qaadi karaan Culeyska, Gaawidhidana culeys badan ayaa saaran, hadii iminka taa la qaado waxaynu arkaynaa waddoyinkoo xidhan oo la isku haysto.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Hadii Meel wax la saarayo Wasaarada Maaliyada ha la raaciyo waxay qaado oo Wax Macquula ha lagu daro, laakiin laba tacriifadood oo isbarbar socda in la sameeyo waa mushaakil, waxaana leeyahay Cashuurta ha la saaro Isgaadhsiinta aan laga qaadin Cashuurtii ku waajibtey, Qaadka, Sigaarka iyo waxyaabaha iyo waxyaabahaa aan aadka loogu baahanayn ee Macaashka badan laga helo, Xoolaha iyo dadkuna ma qaadi karaane ha laga daayo.

11. **Md. Farxaan Maxamed Cali:-** dan qaran baynu ka hadlaynaa waana in sharciga dhinac ahaan loo eegin, Xeerkani wuxuu ku soo beegmay xaalada isbadal weyn oo xaga waddooyinka ah iyo dadkii oo baraarugey, wakhtiyadii hore dadku waddooyinka kama fakari-jirin, iminka waddooyinka la sameeyo ayaa timi oo dadkii qofba meel xagaafay, taasi waxay keentay in dadkii ku soo ururaan Madaxtooyada oo ay leeyihiin waxna waan qabsanaye intaas ayaa dhimane wax ha naloogu daro, waxay kaloo keentay in Madaxtooyadii inay fakarto oo ogaatey inay hay'adihii waxay ina tareen aanay jirin.

Dadka ayaa sameystay oo bilaabay wadda dila ilaa boorame isku xidha, waxaa la ogaadey in waddooyinka la dhisan karo, markaa waxaa timi side wax u qabsan karnaa, marka aad adigu wax qabsato ayaana wax laguu qabanayaa, hadaanad adigu fikirin oo waxba qabsan cidina wax kula qaban meyso, Markaa hadii la yidhi aynu isku tashono aniga sax bay ila tahay in wax la iska ururiyo.

Waxa jirta aafo qaran oo taabatey Gawaadhidii, goboladii iyo degmooyinkii iyo dalkii oo dhan, aafadaa qaran way ina soo martey Ciidamada raashin looma hayn iyo dhaqaale oo aafo qaran bay ahayd waxaa la sameyn jiray madaxweynuhu intuu tijaarta la shiro ayuu ka qaadi jirey, tijaartii cashuurtii markii la weydiiyayna nin walba wuxuu yidhi sow anigii ciidamada siiyay, side loo xaliyay markaa, Madaxweyne cigaal madaxweyne Siilaanyo ayuu markaa Wasiirka Maaliyada ka dhigay oo xal sameeyay.

Sidee buu xaliya Markaa aafadii? Wuxuu yidhi:- **1.** taajir kasta wixiisii ha soo doonto anaa bixinaynee, **2.** Cashuurta taajir kasta lagu yeeshona ha bixiyo, 3. Xoolihii ayuu saarey $3, sidaas ayaa afaafadii taagneyd laga baxay, Cashuurtan dawladu ku dhisantahayna la sameeyay, iminka aafada taagan waa waddooyinka oo ah aafo cusub, markaa hadii iska wax u qabso timi oo waxna loo saaray anigu waxaan u arkayaa sax, markeynu inagu aafada xal u helno oo wax la nimaadno ayay gaaladuna wax inala qabanayaan.

**Markaa anigu waxaan u arkaa:-**

- Aafadaa in la xaliyo oo dhaqaale loo ururiyo Waan taageersanahay, inaguna inaynu taageerno weeye, anigu waliba waxaan leeyahay sidii xilidhibaano badan ka hadleen halagu daro Cosmatiga iyo Sigaarka iyo Qaadka oo ha la kordhiyo Cashuurta.

12. **Md: Maxamed Faarax Qabile:-** Waxaan Xeerkan u arkaa Jiilaal horleh oo soo waajahay shacbiga iyo dadka danyarta reer Somaliland, markaan eego gaadiidka Cashuurta la saaray aan u kaadsano gaadiidka horta marka hore Xeerkani maka warhayaa Gaadiidku waa laba mid sadex bilood ayuu kusoo saaraa lacagtiisa, Xeerkii kala xadaynta ganacsiga oo aan hirgelin ilaa hada Xukuumaduna ay ku guul daraysatay Xeerkaas inay hirgeliso, sidaa awgeed wuxuu leeyahay inuu taayir iibsado sadexdii biloodna uu lawdh helo gaadiidna lacagtiisa wuxuu kusoo saaraa muddo sadex bilood ah.

    Anigu waxaan leeyahay Xeerkani wuxuu kasoo horjeedaa Qodobka 54aad ee Distoorka Somaliland, wuxuu kasoo horjeedaa Xeerka miisaaniyadu ay ku cadahay ee 53, wuxuu kasoo horjeedaa Xeerka 14aad oo ah in cashuurta la kordhinaayo loo eego maslaxada umada waxaan u arkaa Xoolaha nool wixii la saari karaayey horaa loo saaray, Xeerkan maaha in la ogolaado ilaa Xeer loo sameeyo Hay'ada wadooyinka, Xeerkani wuxuu duqaynayaa dadka danyarta ah.

    **Waxaan markaa anigu qabaa:-**

    - In Xeerkani lid ku yahay nolosha umada reer Somaliland, waxaan leeyahay Xeerkan hala celiyo, Golahani yuu noqon kii lagu garaacayey shacabka reer Somaliland.

13. **Md. C/kariim Aw Cali Shabeel: -** Mudane Gudoomiye iyo Mudanyaal waxa lagama maarmaan ah in si masuulnimo oo miyir iyo garasho cuskan aynu u dadihino Xeerkan iyo Xeerarka kale ee aynu gudbinaynoba, mar walbana aynu ka ilaalino sufadka, lab-lakaca iyo ujeedooyinka kale ee siyaasadeed, waxaynu nahay masuuliyiintii Qaranka ugu sareeyay, Xeerarka wadanka loo sameynayaane waa wax mustaqbalka fog loogu tala-galay ee aanay ahayn wax maalmo iyo wakhtigaaban lagu soo koobi karo.

    Waxa aan ugu horeyn soo jeedinayaa ina aynu garano oo aynu yaqiisano arrinta baylahda iyo fool-xumada markasta muuqata iyo wadooyinka la sameynayo burburey mudo ka dib waasi oo ay loo baahanyahay in ay hay'addni noqoto tan u xilsaaran qiimeynta waddo iyo isku duba-ridka waddo kasta oo fulineysa si looga gudbo khasaaraha faah-faahsan oo lga dhaxley waddooyin hore loo sameeyay oo khaas ahaan fuliyaan dawlada hoose sameyen ee yar yar horta marka hore qiimeyn (assessment) lagu sameeyo, halka ay dhibaatadu ka dhacdey ee dhabarka laga jabey waa waddadii oo aan sanad iyo labo jirin ay ku burbureyso iyadoo lacag badan iyo dedaal badan la galiyey.

Sidaa darted, anigu Qodob in lag adhigo oo Xeerka lagu soo daro ayaan soo jeedinayaa kaas oo ah in Hay'addan Waddoyinku ha noqotee meesha laga maamulayaaye inay noqoto meesha Waddoyinka wadanka laga sameynaa qiimeyn ku soo sameysa oo aanay noqon mid sanad Gudihii ku burburta.

Waxaan kaloo **Qodobka 6aad** Gudiddii ee Xeerka soo sameeyay may soo kala saarin Gawaadhidii, waxay ku soo qoreen baabuurta yar iyo qiimihii, baabuurta yar yari qeybo badan bey u qeybsamaan, sida laanguruusar iyo baabuurta ka sii yar yar, Markaa kuma qeexna halkan noocyada Baabuurtu intey ka kooban yihiin, sida cashuurta la inooga qaadona weynu garaneynaa, tasina in la soo qeexo oo Xeerka lagu soo cadeeyo waa arrin lagama maarmaan ah.

Lacagta xoolaha laga qaadayo, laguma soo qorin Xeerka lacagtii xoolaha laga qaadi jirey, waxaa kaliyoo lagu soo qorey inta la kordhiyey oo kaliya, markaa isna Qodobkaasi qabyo weyn ayaa ku jirta.

Sidaan anigu filayo, Xeerarka Maaliyadeed ama Cashuuraha ku saabsan Goluhuna wuu ka hadleye, waxaan anigu arkaa in Xeerkan ay ku haboontahay in Wasaarada Maaliyadu soo gudbiso madaama wixii Cashuura ay leedahay iyadu sidey aniga ila tahay.

Waxaan kaloo aan aaminsahay cashurtan ay xildhibaanada qaar ka hadleen sideynu ka warqabno dalka burbur badan baa ku soo dhacey ay waddoyinku ka mid yihiin, markaa in cashuur la qaado waa lagama maarmaan oo kaa geed ka go'an oo dadkaa lagu celinayaa, tusaale ahaan wadamada caalamka ingriiska oo kale miisaaniyada ugu badan waddoyinkaa laga qaadaa, markaa yaan la odhan cashuur yaan la qaadin, ninka taa ku fikirayaa ma qaranka hala dumiyuu u jeedaa.

**Waxaan leeyahay Mudane Gudoomiye**

.

- Waxaan leeyahay Arrimaha noocaas oo kale ah shacabka iyo Xukuumada yaan la iska horkeenin, oo aan looga dhaadhicin wixii wax loogu qaban lahaa si khaldan loogu sheegin.
- Waxaan kaloo leeyahay Xeerkan dib ha loogu celiyo Gudi dib u soo qoro oo u soo shaandeeya, qiimaha halkan ku qoran dib ha la isula eego Xeerka Qodobada ka dhimana dib ha loo soo eego iyana, yaan lagu deg-degin arrinkaasi oo wakhti la siiyo, hay'adaasi sidey noqoneyso iyo sida loo dhigayona dib ha looga fiirsado.

14. **Md. C/laahi Xuseen Cige:-** waxaan jecelahay inaan marka hore inyar ka idhaahdo hay'adan waddoyinka ee Xeerkan soo sameysay, dakhliga soo gala

Hay'adda Waddoyinka, sanadkan 2013ka waxaa Fuel levy ka soo gala 15% oo u dhiganta 8,102,038,942, Road levy 15% oo u dhiganta 363, 136, 531, lecense levy waxaa ka soo gala 15% oo iyana u dhiganta 190,392,923 waxay isugeyntoodu noqoneysaa 8,655,568,396, iyadoo 10km ay ku baxayso lacag dhan $1,300,000.

Intaa ka dib mudanayaal, inaga oo tix-galineyna ahmiyada balaadhan ee ay waddoyinku u leeyihiin Qaranka iyo horumarka dalka, ogna inay ay waddoyinku ka mid yihiin kaaba-yaasha dhaqaalaha, qeyb laxaad lehna ka qaadaan isku socodka iyo isku xidhka Gobolada iyo degmooyinka dalka, haddii aynu aragney dakhligii hore ee soo galijirey Hay'adda Waddoyinka aynu aragney in si hagar la'aana oo muuqata wax loogu qabtey kaas oo dhan $1,350,000 oo u dhiganta 10km, ayna haboontahay in aynu ugu mahad naqno waxaan filayaa in tan hada oo dhan $5,000,000 oo u dhiganta 40km waxweyn ka qabaneyso dhismaha Waddoyinka, oo sanadkan 2013ka la hirgaliyay 10km, iminkana 50km.

Waxaa lagama maarmaan ah in loo helo dhaqaale wax ku oola oo la saro cashuuraha kale gadisan kuwaas oo aan qabo in aanay soo kordhin cusleys dheeraad ah oo bulshada iyo dalkaba ku keenin, sidaa darted waxaan qabaa in qadanka lacageed ee Cashuurta la saarey Xoolaha dalka ka dhoofaa aanay ku keeneyn wax saameyn ah, waxna ka tareyso horumarinta Waddoyinka dalka, aniga oo qabana in badeecado kale loo saaro cashuurtan oo kala ah, sida jaadka badeecadaha aan daruuriga ahayn IWL.

Gaadiidka waxan qaba in sharciga kala saaro ama cadeeyo Noocyada Baabuurta Gaadiidka Sida:-

Baabuurta Waaweyn 150 kun lixdii biloodba.

Baabuurta dhexe 150 kun lixdii biloodba

Baabuurta kale 100 kun lixdii biloodba

Baabuurtta yar yar 100 kun lixdiibiloodba

Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro Xeerka Qodobada 7aad, 8aad, 12aad, 13aad iyo 14aad, kuwaas oo dhamaantoodba ka hadlaya Gudi, Xeerkan oo ka hadlaya takaaliif Maaliyadeed oo Wasaarada Maaliyadu ururineyso waxaan soo jeedinayaa in lag saaro in Gudi gaar ah oo fundraising sameeyaa aanay ku habooneyn Xeerka.

**Waxaa soo jeedinayaa:-**

- Inaynaan Xeerkan Masuuliyada Faraha badan inga saran tahay uga faa'ideysan daro siyaasadeed ee wixii inagu waajiba ee Xeerkani leeyahay aynu gudano, aniga oo og in Xeerkan loo baahan yahay oo aanu ahayn mid Madaxtooyada ka yimiye uu yahay Xeer Cashuureed oo la mida Cashuuraha dalka laga qaado, waxaan kaloo qabaa hay'adda Madaxtooyada la hoos geeyaa ay ahmiyda gaar ah leedahay, waayo madaxweynuhu waxaad ogtihiin inuu yahay Gudoomiyaha hay'addo badan iyo Xogaanka Guud ee Ciidanka Qaranka Dalka.

**15. Md. Cali Yuusuf Axmed:-**

**16. Md. Ibrahim Mahdi Buubaa:-** Gudoomiye, Mudanayasha iyo Marti sharafta waan salaamayaa, ugu horeyn waxaan jecelahay inaan kalmada yar ka idhaahdo qaabka Xeerkani Golaha ku yimi, waxaan leeyahay qaabka uu Xeerkani Golaha ku horyimi, sideynu lawada socono xeer-hoosaaka dhigayo waxaa xaq u leh inay soo odorsaan Golahana horkeenaan oo ah Gudidda arrimaha Bulashada, waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan dib loogu celiyo Gudiddi xaq u lahayd.

Waxaan kaloo taabanayaa, Hay'adii Waddoyinka oo mudo soo jirtey soo qabatey waxyaabo la taaban karo oo ka mid yihiin dayac tirka Buundooyinka waddoyinka dalka Hargeysa ka bilaaba ilaa bariga dalka oo EUdu ka caawisey hay'adaas, waxay ka war haynaa in hay'adaas EUdu lacag u hayso hay'adaas gaadheysa 20 kun oo dollar gaadheysa, waxaa cadaatey in EUdu joojisey lacagtaa sababtuna ay noqotey ka dib markii la hoosgeeyay hay'addas Wasaarada Madaxtooyada, sababtuna noqontey inaanay la xisaabtami Karin Wasiir hay'addu oo noqoto hay'ada waddoyinku mid madax banana si ay waxqbadkeed ugala xisaabtamo.

Ujeedeeyinka loo hoos-geeyay Wasaarada Madaxtooyada hay'addan waxaa loo haystey in madaxtoyadu lacagaha faraha badan ee ay hayso iyo deeqa faraha badan ee Caalamku inagu caawiyo balse waxaa cadaatey in ujeedada loo hoos-geeyay ay tahay in Shillimo lagu ururiyo waxaana cadeynaya xeerkaa ina horyaala, waxaa la inooga fadhiyay in lacagaha dadka carabtu ugu deeqdo waddoyinka ay wax kaga qabato waddoyinka laakiin la inoogama fadhiyin in culeys lacageed la inagu kordhiyo.

Waxaynu la soconaa in Madaxweynuhu wadda Ceergaabo uu dhagax dhigey aad iyo aad baa loogu baahanyahay wadda Ceergaabo, yaanay noqon dhagax dhigaasi mid lagu kufo, ha noqdo dhagax dhigaasi mid dhameystira waxqabadkii aad balan qaadey.

Laba Miisaaniyadood dalku ma qaadi karo, Miisaaniyada Qarankana kuma soo ururin takaaliiftan manta ina hortaal, dalkan waxaan uga masuula wixii cashuura Wasaarada Maaliyada, Markaa Xeerka Wasaarada Maaliyada ha hoos tago hana laga saaro Wasaarada Madaxtooyada, hay'ada Waddoyinkana halaga hoos saaro Wasaaradaas oo ha laga dhigo Mid madax banana.

Xoolaha Nool, Xeerkan ina horyaal wuxuu jideynayaa in lagu soo rogo takaaliif cashuur ah aanay qaadi Karin, waxaad la socotaan Xoolaha nool inay yihiin sheyga kaliye ee Qarankani dibada u dhoofiyo, isla markaana lacagta adagi inaga soo gasho, waxaad u war haysaan inay Xoolaha Caalamka inay tartan kula jiraan xaga miisaaniyada, iyadoo Xukuumadu markey cusbeyd lacag cashuura saartey manta waxaa cad inay ku kordhineyso oo intii hore in ka badan saareyso.

Waxaa cad hadii aynu xeerkaa cashuurta Xoolaha u jideyno Maanta, iyadoo ogaatey in caraf xoolaha dhoofa oo kaliya hadaynu u ansixino in ka badan 100 milayn oo dollar ka soo xeroonayaan, taas oo laf-jab ku ah xooleheena iyo suuqyada ay tartanka kula jiraan, Waxaad ogtihiin dekedeena inay dekado daris la ah oo ay tartan kula jiraan ay u leexan doonaan oo dekadu xidhmeyso.

Gaadiidka, gaadiidka oo aan qaadi Karin kharashka Xeerkan ku qoran, waxaad ka warheysaan baabuurta gawaadhida waaweyn 2 jeer wax ka badan xamuul maqaadaan rag baa dab ku qabtey markey waayeen waxay ku qabtaan, Markaa miyay habontahay in iyadoo Cashuurtii wadda marista laga qaado in 4 jeer oo kale cashuur ah lagu soo rogo oo saddex biloodba mar laga qaado.

Waxaad ka war heysaan gaadiid leyda berbera in maalintii xeerkan Wasiirku ina horkeenay ay mudaharaad ka sameeyeen, waxaad kaloo ka war heysa in seylada burco mudaharaad ka dhacey, waxaad la socotaan in Magaalada Hargeysana Mudaharaad ka dhici doono, waxad ogtihiin dadka Somaliland oo

dhan bari ilaa galbeed in meelintii 2 jeer ay wax karsadaan, malaha waxba war uma haysaane, ma caqli-galbaa Mudanayaal idinkoo umada ka masuul inaad Xeerkan ku sii deysaan.

Waxaad ogtihiin in Miisaniyadii 2010kii surplus baa ka badan 12bilyan ka badan xagay martey maxaa wax loogu qaban waayay, waxaan aaminahay waddoyinka waxaa wax ka yar baa ku baxaya hadii la sameynayo, Xeerkan waxaa ka soo xeroonaya 100 milyan sanadkii, markaa Wasiir maxaad rabtaa in bilaa sabab Goluhu kuugu ansixiyo Xeerkan oo aan xisaab xidh iyo qorsheyn lahayn.

Waxaynu ognahay in dadku dhisteen waddoyinka Hargeysa-Borama dad baa dhistey, Hargeysa-salaxley, Burco iyo Oodweyne, Ceergaabo dadkaa dhistey dawga cad dadkaa dhistey, miyaaney kicineyn dadkii waxaa dhistey markaad takaaliif ku soo rogto, waxaynu ognahay in dawlada Emarad Carabtu lacag aan ka yareyn 45 kun oo dollar inoogu deeqen halkey martey waa la idiinka fadhiyaa, Xeerkan kuma cada in Wasiiradu soo ansixiyeen kumana lifaaqna.

Qodobka 6aad waxaad gawaadhida yar ku soo qortey 95,000, gawaadhida waaweyna 390,000 iyadoo cashuurtii waddamaristana laga rabo, in wuxuu Wasuurku inoo sheegay in shidaalka loo saaro lacag waddoyinka, xagey ku dambeysay, Xeerkani markeynu eegno Qodobka 6aad oo lacagta lagu qiimeyay dollar, goormeynu noqoney mareykan oo Golaha la horkeenay Xeer ku qoran dollar

**Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa:-**

- Looma Baahana Takaaliif hor leh oo lagu soo rogo dadka, Waddoyinka waxaan leeyahay Lacagihii hore ha lagu dhiso.

17. **Md. Axmed Maxamed Diiriye Nac-nac:-** shir-gudoonka sharafta leh iyo Mudanayashaba waad salaamantihiin, Salaan ka dib, anigoo aan hadalka sii badineyn, waxaan ka waramayaa Xeerkani waa mid muhiima ninkii wadaniya uun baa ka dhiidhiyaya, anigaa garanaya manta Xeerkan in loo baahanyahay oo waddoyin dhisey nibaan waligii waxba dhisan kama hadli karo.

Waxaan idiin sheegayaa neefka adhiga ah la saari mayo lacagtee waxaa la saarayaa ninka diraya ee dhoofinaya, dadka iyo Xooluhuba way nasanayaa, Gawaadhidu waxaa ka yaraanaya spare partski badnaa ee ay iibsanayeen, waxan waa waxaad dadka dhibeyn ee wax u taraya, wadanka wa inaynu wax u qabanaa oo dalkeena hagaajisanaaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerka waa inaynu sidaa ku ansixinaa oo sii deynaa, waad mahadasntihiin.

18. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** shir-gudoonka, Mudanyaasha, Saxaafada iyo Marti sharafta dhamaantiin waan idin salaamayaa, Mudanyaal waxaynu ka warqabnaa oo ognahay dhibaatada dhaqaale xumo ee adag ee shacbigeena ku habsatey taas oo sababtey sicir bararka raashinka saara iyo shaqala'aanta baahsan, sidaas oo ay tahay Xukuumadani inay tudhaan eegayay shacbigeeda, shilingka la saaro Neefka Xoolaha ah isagoo laba jibaaran buu shacabka dib ugu soo noqonayaa oo neefka adhiga ah hadhow markey raashin ku badashaan waa la toban laabayaa, Waxaan filayay iyadoo Xukuumadu ku xisaabtameyso wakhtiga shacabigeenu ku jiro iyo baahiyaha dhaqaala xumo ee taagan, waxay ahayd inay baahiyaha lexuryga ah saarto cashuurta.

    Halka xoolaha iyo gaadiidka laga saarayo waxaan ku wadey in Qaadka iyo sigaarka oo aan loo baahnayn iyo Cosmatics, Isgaadhsiinta iyo Xawaaladaha ay saarto cashuurtan lacagta Xoolahan ay saartey ka soo baxaysa toban laabkeeda baa kuwan ka soo baxaya, halkaa waxaa ka cadaatey in xukuumadani aanay u tudheyn shacabigeena, intii xukuumadani jirtey wixii ay inoo keento sidii hal dabo la' baynu u ansixineynay, markaa waxaan leeyahay Maanta war ilaahay aynu ka baqno shacbigeena dhibaateysana aynu u tudhno inagu haday xukuumadu u tudhiweydey.

    Waxaan leeyahay labadaa Qodob ee Cashuurta la saarey midna ma haboona eh, ha la Saaro waxyaabahaas aan soo sheegney ee aan loo baahneyn, iyadoo aynu ognahay dhibaatda manta Qaadku umadeena ku hayo kuwaas ayaa ku haboon in Cashuurta la saaro, Sidaa darted ma waafaqsani in labadaa la saaro Cashuurtan, waana taageersanahay in Cashuurta la kordhiyo oo wixii cashuurta lagu badin karoba la sameeyo.

    Mudanayaal, Xeerkani Sharciguu baal marsanayahay, Wuxuu jideynayaa Cashuur, Wasaaradii Maaliyaduna mey soo Gudbin Xeerkan, kumana Cadda Xeerka lacagtaasi Cida gacanteeda galeyso, Markaa waxaan leeyahay halkaana Sharcigan hala celiyo Wasaarada Maaliyada ha soo maro iyaduna miisaaniyadu Miisaaniyad Sanadeedka ha ku so darsato iyadoo Cashuurta la saarayo Waxyaabahaa aan loo baahneyn.

    Mida kale, Xeerkan intii inana yaaley inagoo Gacanta ku haynaa hadana la badaley, halkii neefka adhiga ka ahaa $1, 4500 oo shilling baa laga dhigey, waxaa kaloo lagu soo darey Qodob Gudi lagu magacaabayo, Markaa Xeer aynu Gacanta ku hayno in Gudi lagu soo daro mey ahayn, Qodobka 11aad baa ku jira halkaa waxay inoo cadeynaysaa inaanu Xeerkani soo marin Wasaaradii Maaliyada isla markaana aanu mari doonin.

Marka Xeerkani Sharciguu baal marsanyahay, Cashuur lama diidana laakiin waxaanu u diidanahay Xoolaha iyo Gaadiidka in la saaro waayo ma qaadi karaan, gawaadhideena waxaad arkeysaa gaadhi kaa horeeya oo qof traffic ah markuu arko shakal galinaya oo cararaya wuxuu u cararayaa wuxuu kari la'yahay Lacagtii wadda marista, kaasa hadana la leeyahay wax kale ha la saaro.

**Waxaan soo jeedinayaa Gudoomiye:-**

- Xeerkaasu Sharciga ma waafaqsana, Wasaarada Maaliyadu shaqo kuma laha oo Meel kalaa loo wadaa, Markaa waa in Xeerkaa laga fiirsadaa, Cashuurtana Meelaha aan soo sheegay hala saaro oo Xoolaha iyo Gaadiidka ha laga daayo, Xeerkana Wasaarada Maaliyada ha lagu celiyo oo Miisaaniyad Sanadeedka ha ku soo darto Cashuurahaas iyadoo laga taxadirayo Xoolaha iyo Gaadiidka.

19. **Md. Maxamed Axmed Maxamed Dhakool:-** Xeerkan Xasaasiyad baa laga muujinayaa oo loo yeelayaa, Miisaaniyadii Qaranka ee dhameydna Duuduub baynu isku dhaafiney markaa Maxaa Miisaainiyadii dhameyd ee intaa le'ekeyd Xasaasiyadaa loo yeeliwaayey oo Xeerkan looga ifinayaa, waxaan leeyahay Xeerkan xasaasiyad loo eegayaa waa waxa in la is feedho keenay maaanta.

Xeerku xeerarkii la inoogu keeni jirey baa la inoogu keenay Xeerkan, qaabkii la inoogu keenay, Xukuumadii baa inoo keentey, Wasiirkii ay khuseysay baa inoo timi, Gudiddi ay khuseysay baa inoo keentay, intuba qiraal bay inoo wada keeneen, hanta-dhowrka iyo Wasaarada Maaliyada sidey u jeeg-gareynayaan way ku qoran tahay, Markaa waxaa leeyahay Xeerkan in la yidhaahdo Wasaarad dib ha loogu celiyo wax Cilad ah oo keenayaa ma jirto.

Baahida Xeerkan loo qabo Xeerkan iyo dhismaha Waddoyinka nin socdey baa garanaya, Hadeynu eegno Berbera iyo Hargeysa inta dhaxeysa dhowr iyo labaatan tog baa ah, inta dad cuneena waad garaneysaa salaadiin ha noqotee ama xildhibaano iyo dad kale ha noqotee, Maanta Hay'adda Waddoyinka waa xil qabaa, Xeer lacag loogu ururinayo baa la keenay markaa yaan xil qabkaa iyo baahidaa loo qabo waddoyinka dhismahooda yaan la baabi'inin baan leeyahay.

Ceergaabo waddaa ayay go'doon u tahay, war ma waxaad dooneysaa qoladayadaa bariga inaan waligayo halkan joogno, war ha na go'doominina, waxaan qabaa Xoolaha lacagta loo saarey waa wax yar, xoolaha markii hore lacagta saarneyd ugu yaraan $7 bay ahayd, lacagta lacagta lagu dareyna waa waxaan hal dollar gaadheynin oo nus dollar iyo waxaas ah, Gaadiidka ninka hadlayaa, Baabuurta wadda martaa dhibta ku dhacda ninka og baa garanaya, halka taayir ee ka banjaraa kun iyo dhowr boqol buu gaadhaa, dhowr

sanadood waxaa ku filan wadadaas oo loo hagaajiyo oo taayirna ka banjarin, War ninka Gaadiidka u doodayow kharashka gala baabuurta ee ah biraha jabaya iyo taayirada qarxaya aan taas u badbaadino, waxa lagu qoreyba waa wax yar oo $55 ah.

Anigu waxaan leeyahay, Xeerkan laba Qodob halaga saaro, Qodobka 7aad iyo Qodobka 8aad halaga saaro Gudoomiye, waayo in Xeer lagu sameeyo Gudiyo lacag ururinaya waxay tareyso ma laha, sidoo kale Qodobka 14aad meesha Gudidda halagu badalo Golaha Wakiiladu inay dib u-jeegareeyaan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- War Xeerka Baahidiisa ha loo eego oo yaan loo eegin hebel baa keenay iyo hebel baa sidaa yidhi, Xeerkana Labadaa Qodob ee 8aad iyo 7aad halaga saaro sidiisana Halagu Ansixiyo, Wasalaama Caleykum.

20. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** waxaa ina horyaal Cashuur loo doonayo in Waddoyin lagu dhiso, nin Xildhibaana, Bulshada iyo Xukuumada midaan Waddo u baahneyn ma jiro, waynu u sii kala baahanahay Waddoyinka, Wadda Galbeedka qabata iyo Wadda Barriga ee Waddoyinkii madaxweynuhu dhagaxa dhigey ka mida si gaara ayaa loogu baahanyahay, inteynaan Xeerba qoran waxaa loo baahanyahay inay ogaano intee baa lagu dhisi karayaa oo loo baahanyahay, haf millyan baa ku baxaya baa la yidhi mid tan kalena ka daran.

Waxaa halkan Xeerku sheegayaa in Xoolihii iyo Baabuurtii wax la saarey, Miisaniyadii baan eegay 2010kii Xoolaha 50% baa kordhey Cashuurtooda, 2011kii 100% baa la kordhiyey bal miisaaniyadihii eega, 2013kan 39% baa la kordhiyay iyana ka eega buuga Miisaniyada, lacagta waxaa la saarey Geela, lo'dda iyo Adhiga, waxaan iyaga ahayn ma haysano, hadii intaasi manta baa'bado oo Cashuurta markaan ku kodhino ay qaadi kariweyno, ninka baayac mushtariga boosaaso iyo jabuuti buu marayaa.

Waxaan ka maqlayaa niman xildhibano ah lacagta waxaa laga jarayaa ninka adhiga dhoofiya ee jaabiri, waxay ila tahay dee waa khalad in sidaa la yidhaahdo, dee hadey sidaa nidhaahno aynu 20 saarno, waynu ognahay lacagta la saaraa waxay ku ka go'antahay ninka xoolaha iska leh, waxaan leeyahay waan ogolahay in waddooyinka la dhiso oo ka maarmimeyno, iyadoo sidaas ah waxaan leeyahay war arrinta daryeelka xooleheena ma u badalnaa, hadii xoolahaa la waayo oo iminka dhamaanaya oo iminka cashuurta hadba lagu kordhinayo way dhamaanayaan.

**Waxaan leeyahay Sidii Xildhibaanadii hore sheegayeen:-**

- Hay'addu ha noqoto mid madax banana (outonomous agency) aynu Xeerkeeda ansixino.

- Wixii Cashuura ee Waddoyinka lagu kordhinayo waa wixii lexury itemska aan loo baahneyn iyo Central Goverment ha lagu daro oo ha looga doono wixii waddoyinka lagu dhisayo, laakiin waxaan leeyahay Maanta Xoolaha ha laga daayo.

21. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** Marka hore waan idin Salaamayaa, marka hore Xeerka doodiisa waxaa ka horeysa inaynu inagu isa saxno oo anshixii Golaha la soo celiyo, dooda xeerkuna yaaney inaga noqon hebel baa wax jecel iyo hebel baa wax jecel, waxaan idin xasuusinayaa intii Golahani jirey wixii Xeer la ansixiye waxay ka yimaadeen Xukuumada iyo hay'adaha kala duwan, wali intii aynu Golaha aynu fadhiney ma garaneyno Xeer uu Golahani soo unkamey oo wadanka ka dhaqan galay, waxay muujineysaa inaynu hawsheenii gabney oo ay ka mid tahay Xeerka manta ninba dhan u jiidayo, inaga wax inaga yimi oo dhaqaalaha la xidhiidha oo inteynu aqoon galiney soo saarney ma jirto.

Hadaan Xeerkan u soo noqdo wuxuu ka yimi Golaha Xukuumada, Wasaarada baa keentey si bay u soo dhigtey, Gudi baa loo dhiibey, waxay ahayd iney Xeerka soo eegto oo waxay ka soo shaqeysay Golaha horkeento, xeerkan shaley la inoo qeybiyay wuxuu u egyahay Xeerkii Xukuumadu keentey, aynu eegno Xeerka dhaliilaha uu leeyahay, ka doodo, ku ansixino haduu ansaxayo, aynu eegno faa'idada dalka u leeyahay iyo Baahida Keenteyba, waddoyinka dhismahoodu waxay dalka dhaqaalihiisa ka tareyso aynu eegno iyana, yeynaan eegin, cidaas ayaa soo gudbisey iyo cidaas wadata, Golahana way u banaantahay haduu soo saarayo Xeerka dhaqaalaha wadanka kor u qaadaya haduu noqdo Xeer isgaadhsiinta ah, Mid Waddoyinka ah iyo mid Cosmaticska ahba oo cashuur lagu kordhinayo waa wax inoo banana oo aan cidi inaga lahayn.

Hay'adan iminka lagu celcleinayaan waa mid abuurneyd ee maaha mid cusub, hadii wax lagu kordhinayo oo cashuur la saarayona waa wax loo baahanyahay oo wax ina taraya, dooda waxaa ka maqlaya maxaa loo saari waayey cida ceynkaas ah, ciddi inagama laha ee inagu aan saarno waxaynu faa'iido u aragno.

Hadaan Xeerka u soo noqdo, anigu laba qodob ayaan Xeerka kaga noqonayaa, midi waxa weeye, Xeerka Sidii Wasaaradii keentey u soo dhigatey iyo Gudidii loo saarey waxay soo sameysay inay labadii Golaha keento ayaa Xaq loogu leeyahay Gudiddan iyo Gudiyada kale ee Golahaba.

Qodobka 5aad ee tilmaamaya inta ay tahay cashuurta la kordhiyey, Wasiirku maalintuu halkan fadhiyey wuxuu inoo sheegay Neefka adhiga ah la saarey 1$, markey Gudiddi isla eegeen ay kawada dhigeen $0.5, iminkana Gudidii waxay inoo keentey wax ka duwan oo ah 4500 oo shilling oo u dhiganta $.75, marka waxaan leeyahay horta Qodobkaa ha la saxo oo ha laga dhigo sidii ay ahayd ee

$0.5 oo noqoneysa hadii halka u sareysa laga dhigo 3400 oo shilling neefka adhiga ah, waa wax laga qaadi karo neefka ah oo la saari karo ha loo daayo, hadii meel ku haboona la saarayona way haboontahaye Goluhu ha soo saaro oo aynu garano shaqadeen, lo'da iyo geelana isku mid baanu ka dhigney buu Wasiirku inagu yidhi oo iyana noqoneysa $2.5 oo u dhiganta 17600 shilling.

**Qodobka 6aad F/2aad** ee ka hadleysa Gaadiidka waxay ahayd gaadhiga 3 tan ah in laga qaado $15 iyo sanaati lixdi bilood tankii, oo saddexdii tan noqoneysa 270,000 shilling, halka Gudiddu wixii duuduub ah gawaadhidii oo dhan ka soo qaadeen 390,000, gaadhiga 3 tan ah waxaanu ku qiimeynay 270,000, gaadhiga weyn ee 20ka tan ah waxaa lagu qiimeyay 390,000, markaa waxaan leeyahay mid walba inta lagu qiimeeyo tankiisa gawaadhida, Xoolahana intii wasaaradu keentay iyana ha loo daayo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Cashuurta sidey ahayd ee Wasaaradu u sheegtey ee gawaadhida iyo Xoolaha ah Xeerka ha lagu qodobeeyo, hadeynu inagu wax soo saareyno ha la tir-tiro Xeerka la inoo keenay oo aynu soo saarno wax, Hadii kale Wixii la inoo keenay aynu Ansixino.

22. **Md. Cabdiraxmaan Yusuf cartan:-** Shirgudoonak iyo dhamaan mudanayaashaba waan salamayaa, sharaf wayn ayay ii tahay in aan ka qayb qaato dooda Xeerka dhaqaale u samaynta wadooyinka anuu dooda waxaan ku soo koobayaa sadex qodob:

1. Nuxurka Xeerka
2. Qaabka xeerku u dhigan yahay
3. Dhawaale burburka wada xumidu ku hayso gobolada bari

Waa mashruuc sharci oo ay xukuumadu ku doonayso in ay ganacsi gudaha ah gaar ahaan xoolaha dhoofaya iyo gaadiidaka tacriifado dheeraad ah lagu saaro, iyada oo taa uga dan leh in dakhli dheeraad ah ugu hesho hagaajinta wadooyinka sida wadada isu xidha Burco iyo Ceerigaabo, marka xaal sidaa yahay waxaa Golaha sharafta leh ku waajiba in ay si xilkasnimo leh uga baaraan dagaan, uga doodaan si ay talooyin wax ku ool ah uga dhiibtaan.

Qaabka mashruucan sharci u qoran yahay Xeerkanu si faah'faahsan uma qorna badeecaddo iyo ganacsiyo oo dhawr ah kuna haboon in tacriifada lagu kordhiyo oo ay ka mid yihiin Qaadka, Sigaarka,

Sharaabka, Cosmetics, Xawaaladaha, Isgaadhsiinta Bacda, Electronics ka qashin qubka ah ee laga soo waarido shiinaha ee talaato baystaynka lagu soo waarido kuma qeexna xeerkan taasina waa mid Golaha u taala.

Mudanayaal waxaan jecelaha in aan is dultaago dhaqaalaha burburka ay wado xumidu ku hayso inta badan ee Gobolada iyo Degmooyinka dalkeena, gaar ahaan Gobolada bariga, Gobolada Galbeelka, Buuralayda iyo dhul Xeebaha qofkasta oo u safray Ceerigaabo, Saylac, Lug-haya, Bullo-xaar Shalcaw, Xiis iyo Maydh. Laas-qory, wuu garanayaa rafaadka ay dadka iyo gaadiidkuba mutaystaan kamana soo laabtaan iyaga oo saliima, halka qofka mar u socdaalaa aanu mardanbe hawaysan tagideeda mar labaad meelaha aan soo sheegnay oo dhan inagaa u Baarlamaan ah inagaa u wakiilo ah dadkaa dagan goboladaas, markaa talaaagbo kasta oo wax laga badalayo in aan tageerno ayaa waajiba ah dagmooyin kaasi waa kala badha dhul waynahay Somaliland.

Markaa hadii aan si gaar ah isu dul taago gobolka sanaag waana Gobol hodan ku ah Xoolaha, Beeraha, iyo Kaluumaysiga isaga oo sidaa ah hadana waa Gobolka ugu horumarka yar uguna fiqiirsan Gobolada Somaliland waxaana ugu wacan waa wado xumaha, maata dhul Bereedkii ay ka midka ahaayeen Midhishi, Hareed, Shumux-shumux, Dayaxa, Raqas, ILad, wax dalag ah oo nimco lihi kama soo go’aan waxaana ugu waxani waa wado xumadda, dhul beereedkaasi waa dhul qadiimi an oo lada beerijiray nooc kasta oo dalaga beeraha ah 100kii sano ee ugu dan beeyay, maanta geed wayn tii sida Saytuunka, farsuuga, Liin dhanaanta iyo Liin macaantaba, oo ay dhirtii ku dul qalashay oo dadkii lahaa garan waayeen si ay yidhaahdaan,

Sababta oo an baabuurka soo qaadaya oo qaaliya waayo wado ma haysto taasina waxay sobobtay in jawaakii khudrada ahaa uu libin laabmo wado xumo awgeed, marka uu xaalku sidaa yahay waxaa is taagay wax soo saarkii beeraha, taasina waxay keentay in khudaartii laga soo waarido dalalka aynu jaarka nahay ee Ethiopia iyo Yemen taasina ay caqabad ku noqotay intii yarayd eek u dhaganayd beeraha ama sii beeran jirtay.

Mudanayaa sanaag waxaa ka baxa Fooxa iyo Beeyada ugu wanaagsan waana qabcada kaliya ee uu ka baxo geedka layidhaa Maydiga, labada shay ee Somaliland u iibgayso caalamka ee lacabta badani ka soo gasho waa Xoolaha nool iyo Beeyada, xoolaha nool garanay ma si waydiiseen halka ay martay beeyadii mudanayaal beeyadii dayac iyo waddo xumop awgeed way baa'baday, hadii ayni dayac tirno oo hadgaajino wadooyinka waxaa inoo hirgalaya khayraadka inaga maqan, magaalo xeebeedyadiina dhamaan waa dayacan yihiin wado la'aana waa uga qatanahay khayraadkaa.

Markaa maanta hadii wado isu xidha Ceerigaabo iyo Burco dhalinyaro badan ayaa shaqo helaysa, boqolaal gaadiid ah ayay shaqo u abuuraysaa waxaana isu xidhmaya gobolada Bari iyo dalka inta kale

Mudanayaal maanta mataagna laamay ma dhignaa ama caratuul ee waxay taagan tahay ma bilawnaa sida aad ka wada warqabtaan wadada isu xidha JIjiga iyo Herer mudo badan ayay ahayd caro tuul, markaa xitaa haday caratuul noqoto wax bay taraysa

Sidaa awgeed intii ceerigaabo tagtay waa tagtagay ayaa aragtaye dhawr km ayaa caratuul ah oo ay hirgalisay Hay'adda ILO ka bilawday duleedka ceerigaabo, Yufle, Kal-sheekh, Ceelafweyn markaa marka meelahaa la soo gaadho ayay rakaabka iyo baabuurtaba naftu soo gashaa

Hadii aan in yar iftiimiyo lacagta ay Hay'da Ilo siisay dadkii Shaqaalaha ahaa waay ahayd maalintii 3 dollar ayay ahayd goobtiina waxaa ka shaqayn jiray 80 qof , lacagta ku bixi jirtay goobta maalintii waxay ahayd 240 dollar bishiina waxaa ku bixi jirtay 7.200 dollar, sanadkiina waxay noqonaysaa 86,400 afartaa goobood 345.600 dhalin yarada ka hawl gali jirtayna waxay ahaayeen 320 dhalinyaro, halka lacagta jaadka inagaga baxdaa ay tahay maalintii 12,00 dollar bishiina ay tahay 360.000 dollar, sandkiina waxay noqonaysaa 4,320 ,000 markaa lacagta ceerigaabo ku qayishaa waxay ka badan tahay lacata lagu ay ku shaqayn lahaayeen 320 dhalinyaro ah.

Markaa bal qiyaas lacagta ku baxda qaad magaalooyinka waawayn ee Somaliland sida Hargeisa, Burco, Boorama markaa waxaan u baahanay in aad dadka aan wakiilada u nahay aan hoos u eegno dhaqaalahooda

**Waxaan Soo jeedinayaa:-**

- Maanta Waddaa in Taageero Mooyee Mucaaridnimo Mahala, Markaa waa inaynu taagernaa.

**23. Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** Shirgudoonaka, mudanayaasha, Shaqaalaha, warfaafinta iyo martida kalaba waan salaamayaa, doodani waxay socotay mudo sadex casho ah, waxaanad modaa labada ra'yi in mudanayaashu midba midka ka horeeyay wadadii ama rayigii uu maray kii hore haduu saxsan yahay iyo haduu diidan yahayba, anigana waxay ila muuqataa in qaabkii dadku u dhigay si ka duwan baan u dhigayaa, marka aan eegno dhanka mabaadiida guud, Xeerkan ma loo baahan yahay in dhaqaale wadooyinka lagu dhiso ma loo bahan yahay mise looma baahana?, taasna basical waxaad moodaa in aan isku wada raacsanahay inta Xeerka ka soo horjeeda iyo inta ogolba rayi ahaan waa mid la isku raacsan yahay waana qodob wanaagsan maadaama aan isku wada raacsanahay in manta Waddoyinka loo baahanyahay in la dhiso.

Waxaana aniga illa haboon rayi ahaan in aan sadex sababoob aan aasaas ka dhigano oo kala ah:-

1. Baahida loo qabo wadooyinka in la dhiso.
2. Isu gudubka wadooyinka oo aan ku raacsanahay intaa uu cartan ka Hadley ee Goboladaa barriga iyo Waddo xumadeeda, isku gudubkuna wuxuu xayiranyahay, iyana waan isku raacsanayn in dhimashada iyo dhawaca wadda xumada ka yimaada uu badan yahay.
3. Mida kale khasaaraha ay gaystaan gaadiidka naf iyo maalba waxaana si wanaagsan inoogu faahfaahisay hay'adii wadooyinka, xildhibaano badana ka hadleen iyana waan isu raacsanahay.

Waxaana siwanaagsan uga hadlay xildhibaan dhakool oo kalmad mihiim ah ka soo jeediyay halkan oo yidhi gaadhi wayn taayiradiisu waa 500 dollar ama 700 dollar waxaad ka warantaa hadii uu hal taayir ka qarxo oo aynu ka dhigno sanadka dhan inuu hala taayir ka qarxo oo ah 700 oo

dollar, 390 kum oo S/sh/l uu yahay in ta lagu daray sanadkii, lacagtii hal taayir oo ka qarxa aan tahay $700 ma isu dhigmaan khasaare ahaan iyo kharash ahaan.

Qodob kale oo dooda ka muuqday waxaa uu ahaa sharcinimada, Wasaarada keentey sharci ma yahay, waxa doodeena ugu badani waxay ahayd xukuumadii Daahir Rayaale, Xukuumadu ma keento oo iyadu way dhaqan gelisa oo socodsiisa,Xeerarka, takaaliifihii ka horeeyey kuwan aynu halkan ka ansixinay ee ay ugu danbeysey tii ku saabsanayd Airports ka iyadoo mudo la isticmaalayey oo Xukuumadu ay marsiisay oo ay shaqaynayso ayaynu inagu mardanbe ansixinay inta madaxtooyadu wasaaradii ay u garatay in ay ina soo hordhigto, markaa laba aan kala dayno takaaliif la inoma keeno iyo marka la inookeeno maxaa la inoogu keenay, sharciyada ku saaxban mase haynaa qaylo ka soo yeedhay xukuumada, hadii aan leenahay wasaaradii maaliydu maysoo ansixin waa wax kale hadii aan leenahay golihii wasiiradu waxay yidhaahdeen man soo ansixin oo nama soo marin waa mid kale.

Wasaarada Maaliyadu lacag ahaan waxay leedahay ururintee, lakiin technically waxana haboon hadii ay tahay takaaliif waa in Wasiirkii qaabilsanaa yimaado sidii wasiiradii horaba ay u yimaadeen haday ku saabsan tahay wadooyinkana waa in ay timaadaa oo ay inaga dhaadhicisaa Wasaarada ku shaqada lihi oo ay inaga dhaadhicisaa, Markaa anigu ma shu'eysan waa dhici kartaa qof si kale xasaasiyad uga qaba oo taasina waa gaar.

Qodobka sharcinimada, waxaa looga hadlay qaab kale oo ah cida la hoosgeeyay waxaa sidii wasiirka hadalkiisa ku xusnayd in mabdi'iyan ay xukuumadu qabto in hay'adani u baahan tahay in la dhiso lana dhameys tiro sharciyadeediina la sameeyo oo marka la dhameystiro la inoo keeno, waana arin u baahan wakhti, mid kalaana sii dheer Xeerka waxaa ku jira qodob odhanaya in xukuumadu keeni doonto Xeerka wadooyinka waxaana filayaa in uu yahay **Qodabka 13aad**, fasiraad uma baahna markaa.

Midna dhamaanteen waynu ka dharagsanyahay hay'adan Waddoyinku Mudadii ay hore u jirtey Waxay u muuqataa in ay fadhiid aheyd oo aanay

shaqayn mudadii, Mudadii yarayd ee ay gacata ku haysa xukuumadu ee Madaxtooyada la hoosgeeyeyna wax badan bay qaabatey.

Waxaan ku soo Koobayaa, Waxaan u mahad celinyaa Xukuumada Wasaarada Maaliayda iyo Wasaarada Madaxtooyada Garashada ay garteen in Waddoyinka la dhiso,

**Waxaan Soo jeedinayaa ugu dambeyntii:-**

- In marka Xeerka soo jeedimaha Meelaha yar yar ee aan sheegay laga saxo in si deg-dega loo ansixiyo, waad-mahasantihiin.

**24. Md Cabdiraxmaan Cismaan Caalin:-** Shirgudoonak iyo mudanayaashaba waxaan marka hore u soo jeedinayaa salaan, mar labaadka waxaan aaminsanahay in xeerkani uu yahay xeer mudan in sidagan oo maskax furan looga doodo oo aanu inaga galin is riix-riix muran iyo is dur maxaa yeelay markaad eegto mabaadiida uu ka hadlayaa ay tahay kuwo wax lagu horumarinayo, markaa waxaan odhan lahaa inaga oo eegayna danta dalkeena iyo dadkaba yaanay iskaga keen dhex darmid xifaaltanka yar yare e dhexdeena ah ee aan Xeerkana ka midha dhalino.

Markaad eegto wadankeena Somaliland layidhaahdo asaaskiisii iyo u dagaalankiisiiba waxaa lagu soo dagaalamay waxaa ka mid ahaa dhiiga danyarta oo lagu kabay wooyo waxaa lagu soo dagaal galay markii dagaalka Orgiga, Wanka, Awrka, iyo Dibiga ay dadka danyarta ahi lahaayeen ayaa lagu soo galay oo lagaga xoreeyay cadawgii dagaan qayb ayna ka ahaayeen oo lama xorayn kareen ayaan qabaa anuu.

Waxaa kale oo aanu qabaa mudanayaal iyo shirgudoonba in dhaqaale heen uu dalkani ku faddhiyo ee lagu maamulo ee lagu dhisay waxaa kamid ah xoolaha waxaanay ka yihiin 75%, maadaama uu dalkani ku fadhiyo dhiiga danyarta laguna wadi doono ilaa inta laga ictiraafayo markaa su'aasha mudan ee u baahan in la is weydiiyaa waxay tahay Ma u baahanahay in wadooyin la sameeyo?, kuwa Ceerigaabo ama kuwa dawga-cad ha noqodeen, ama Kalabaydh hanoqoto, ama Baligubadle ha noqoto ama Saylac hanoqotee wado ma loo baahan yahay in la sameeyo.

Anigu hadaan mid yar idin tusaaleeyo, waxaan ku jiraa Gudidda Dawga-cad lacagta lagu qiimeeyayna waa 4.5 milyan marka laga reebo 13km oo ilaa 700 000 kun ku kacay 62 km ee hadhay waxay dawladu ku balan qaaday in ay 50% bixiso waxaanay bixisay 5mk ee ugu horeeyay anaguna mark ay dhamaato waxaan samaynaynaa 10km xagaan ka keenaya hadaan dawlada

lagu tiirsan, hadaan cashuur la helin xagay dawladu ka keenaysaa lacagta, haddaan cashuur macquul ah la saarin dadkeena oo ay waliba danyartu ka mid ahaato oo dawladu aanay ka mid noqon markaa waa in danyartu kaw ka ahaayeen awalba waa in ay hadan ka mid noqdaan oo dhiigooda ay huraan qaar badanina waa balan qaadeen.

Waa in aynu cashuurtaa waajibinaa, marlabaadna waa in caawimada aan helno waa In lagu kabaa, mar sadexaadka waa In laqaadaa shirkadaha oo wixii ay bixinayaan iyo hay'adaha caalamiga ah waa in sexdaa marka la isu geeyo, waa ineynu dawlada u gacan baneynaa oo aan ku daba galnaa si ayadu u samayso wadooyinka oo ay gacan saar la yeelato, waxaana mida ugu mihiim santahay taa dadweynuhu ay bixinayaan.

Waxaan qabaa cashuurta sida ay mudanayaashu soo jeediyeen waa in dib u eegis yar lagu sameeyaan waxaan qabaa in neefka Adhiga ah laga qaado 0.5 % neerka lo'da ahna waa inlaga dhigaa 1.5 dollar halka neefka geela ahna la qaadayo 2 dolaar, waxaas oo la isu geeya ayaa wax noqonaya oo aan ku kabanayanaa cashuuraha caalamiga ah, cashuurta baabuuta yar waxaan la qabaa mudanayaashii soo jeediay in la standergareeyo oo ay noqoto oo laga qaado 5 dollar kuwa ugu yar, 6 dollarna laga qaado ku dhexe 7 dollarna a laga qaado kuwa ku sii xiga.

Waxaa kale oo aan odhan lahaa sidii ay midanayaasha qaar soo jeediyeen in aanay baabuurta waaweyni aanay waxba ku noqonayn ratekaas marka aan sanadkii laba u qaybino maadaama cashuur kale laga qaadayo oo ay tani biiris tahay oo aan ka dhigno 25,000, 30,000, 35,000 s/sh/l oo aan sanadkii laba u qaybino ta kale waa in laga saaro qodobka sheegay gudidda waa in meesha laga saaraa waayo waxaan donaynaa in Xeerkani uumodo badan sheqeeyo.

Mudanayaal hay'adani budget ka way inoogu jirtay oo misaaniyada qaran weynu ku ansixinay maadaama aan hay'addan Miisaaniyada aan ku ansixinayna waa sharci, waxaa kale oo jira in aan ansixinay lacag 4 dollar ah anigu barigaa waan diidanaa lakiin halkan ayaa laga ansixiyay waxaa kale oo jiray 10 dollar ee lacagtii amniga maadaarada oo iyana la ansixiayay markaa maxaa tan gaar looga saaraya oo loo diidayaa.

**Markaa waxaan odhan lahaa:-**

- Mudanayaal mar hadii laga hadlaayo horumarinta wadoonyinka waxaa muhiin ayaan odhan lahaa in aan is ka dayno caadifadda iyo wax yaabaha marinka inaga halaynaya, waanad mahad san tihiin

25. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** Shir-gudoonka iyo Mudanaashaba waan salamayaa, xeerkan lagu magacaabay waa xeer aad iyo aad u mihiim oo ahmiyad gaarana u leh isu socodka wadoo yinka waana xeer aad u wanaag san

Hadaba waddoyinka ma samysanaa la iskuma hayo ee waxaa meesha yaala halkii dhaqaale looga keeni lahaa oo mesha taala wadada Ceerigaabo ciddi ma diidana ta dawga cad cidi ma diinana ta balaygubadle cidi madiidana lakiin midka aan isu haynaa waxaa weeyaan xageebaa la saarayaa takaaliifta hawlihii aan iskaa wax uqabsada ku wadnay.

Xeerkanu waa uu ka duwan yahay ee yaan la isu qurxin waayo ninkaa baabuurka yar wataa haduu Cashuurtaa bixin waayo maxkamad ayaa la soo taagayaa waana qoor-qabad waana xoog wax ha la isaga qaado ee waxaa dalkan lagu soo dhisay is afgarad ayaa lagu soo waday sida uu distoorkuba sheegay.

Gaadiidkan aan ka hadlaynaa shillinka lagu daraa waxay ka qaadaan waa dadwaynahay oo basaskuba waxay ku daraan waxa dadweynuhu ay ku raacayaan nolka oo dhamina waa uu kordhayaa ta aan ka hadlaynaana waa umada danyarta markaa waa in aanaynu cumaha qaban xukuumaduna waa in ay xashuurta iyadu ay bixisaa meesha ay doontaba ha keenaane cashuurta mar ka horaba waxaa saarnaa 5 dollar, markaa waxaa jira dadkii hore ee xoolaha ka baayac mushtarayn jiray meesha way ka bexeen oo hada ma jiraan oo carab ayaa ka baayacmushtaraysa oo ilaa ka xoolaha dhakhtariya markaa anuu waxaan odhan lahaa xoolaha hadii 10 dollar la saarayo waa in la saaraa.

Waxaan diidanahay in baabuurta cashuur la saaro, ma ogoli, waayo waxay u daadagaysaa waa dadweynaha, maraa yaan lagu noqnoqoni oo aanay xukuumadu odhan itan uu baan garanayaa, mida kale wadada waala wada maraa oo dadban ayaa jooga dalka jooga aad ugu taajiray dhiigaa masaakiinta ee uu cabdiraxmaan sheegayo ayaa jira oo dadka saara lacag xad dhaafa.

Waxaan odhan lahaa hadii ay qoor-qabad tahay ninkii shilling hayaba halaga qaado oo ha layidhaa bixi waana in laga qaadaa hadii ay xawaaladah, isgaadhsiinta iyo baaya-cmushtariga kaleba waa inta tirro-koob la sameeyo loo wadda yeedho dhamaan baayac-mushtariga oo dhan mid hoose iyo mid saraba oo iskaashatooyin ayay leeyihiine waa in ku waa loo yeedhaa, cidda u yeedhaysaana waa xukuumada oo wadooyinka aan ka hadlaynaa waxay u baahanyihiim millions of dollar ee waxba yaan la isu khafiifinin.

Waddada Ceergaabo iyo ta Oodweynaba waan u baahanay ee habkani mid aan wax ku helayno maaha ayaan qabaa, waana mid loo bahanyahay waanan u ololaynayaa lakiin yaan qofka xoog wax laga doonin waayo waa Xeer waxa laga hadlayaana waa takaaliif, markaa Xeerkan dib ha loogu noqdo ayaan leeyahay waxaayo waxaa halkan ku taala hay'adda wadooyinka somalailand ee la yidhaa SRA waana la badalay ayaan filayaa.

Halkan waxaa ku taala waa in xukuumadu ay ku keentaa mudo 15 bilood ah mashruuca sharci ee lagu aasaasi doono hay'adda waddoyinka, waxaaba soo dhaw doorashadiiye oo waxaa hadhay sanad iyo badhe ma waxaa la aasaasi aakhiro waayo waxaa laga yaabaa in aanay xukuumadu joogine waxaa weeyi xeerkanu if iyo aakhirana maahan ee waa in aynaan sii day, In aan danyarta la xagxagan.

**Waxanan odhan lahaa:-**

- Mudane Gudoomiye waxaan ku soo gabagabaynayaa marnaba Kama soo herjeedo wadooyinka in la sameeyo, Xeerkana yaan laga qaadin waana taageersanahay wixii aan dadweynaha aan wax yeelayn oo waxaan qabaa wixii takaaliif ah in meesha laga saaro oo ayaan dadweynahay la saarin culays ayaan odhan lahaa, xeerkaasuna yaan la ansixin ee dib haloo celiyo.

**26. Md. Maxamed Cumar Adan (jiir):-** Mudanayaasha iyo shir-gudoonkaba waan salamayaa waxaan waydiisanayaa golaha dadweynaha ayaa ina eegaya waayo madaxnimo ayay inoo doorteenoo waa ay ina eegayaan mudanayaa waxaanad moodaa in ayaamahan danbe in dhaqan keenu uu u-muuqdo mid dhalinyaro waxaan leeyahay aan is ixtiraamno oo hadafkeenana aan ilaalino.

Markaan intaa dhaafo waxaa jira in waddoyinku sidii loo yidhi ama aan wada ogsoonahay waa waxyaaba umada horumarkeeda lagu tilaami karo ama dadyawga kale ee bila aadamka ahba ee investment doonaya inay gashaan wax yaaba indhohooda soo jiidi kara investment ka waxaa ka mid ah mushtamaca oo ay eegaan ama hogaan kiisa oo ay eegaan oo aan inagu ka midnahay ama in ay woxooda wax ka helayaan iyo in ay eegaan kuwa inaga ah ee investors ka ah ee dalka lacagta galinayay eegaan waayo hadaan nidhaahno ninkaa dalka wax gashanaya sidaa ha layeelo waxaa imanaysa in kii dibada ka yimina ee somalilada ah iyo kuwa ajaanibka ahiba ay woxooda la noqdaan ayaa dhacaysa.

Markaa waxaan odhan lahaa aan hadalkeena iyo waxaan odhanaynaba aan dhawrno mida kale waxaa jira dalkeenu in uu yahay free marketing system oo aanay cidina cid qasbin oo qofwalba uu wuxuu doono galin karo lacagtiisa markaa dadka leh cashuurta ha la joojiyo waxaa ugu badan ee aan cashuurka helaa waa xoolaha soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa togwaliba taagtii ayuu rogmadaa markaa hadii aynaan waxaan haysano ku noqon oo aynaan wax ka soo saarin side ayay wax inoohu suuro galaysaa in aan wax qabsano ma waxay noqonaysaa in aan bila aadamka kale wax waydiisano, aniga waxay ila tahay waxay dadka kale wax ina siinayaan oo ay inagu soo dhiiranayaan marka aan wax qabsano waxa kaliya ee aan haysanaa ee wax inag soo galaan waa xoolaha macal asaf way adagtahay in igaya lagu noqdaa.

Hadaan iyaga waddoyinka loo samayn oo aan raashinka looga gayn oo aan biyaha looga gayn oo aan dawooyinka looga gayn oo meel loo maro lahelin sido ayay noqonaysaa ama wax loo tarayaa waxaan anigu jeclaan lahaa in aan nidhaa wixii iyaga ka soo baxaya inta ugu badan igaya halagu celiyo ayaan odhan lahaa balse ayaan la odhan cirka halaga keeno aniga oo aan u jeedin cid waayo dawlad waliba wexeeda ayay ku noqotaa oo ay wax ka keentaa taa waa in aan maanka ku keenaa.

Waxaa kale oo aan maaqlaayay lacago la inagala noqday dee waa in ay taa dawladu inoo soo cadaysaa weeye, hadii dhismeheena aawadii la inoo-gala noqday lacagtaa waa in la ino soo cadeeyaa oo aan dhismeheena aan ku noqonaa lakiin waxaa in aan dib u noqonaa in constitution ku Madaxweynaha siinayo siduu isagu u maamulayo dawlada iyo waxyaabaha uu isagu is hooskeenayaba illama aha wax aan faragalino, waxaan inagu xaq u leenahay in aan la Xisaabtano meelaha cashuurtu martay ayaan soo jeedin lahaa maadaama aan nahay odoyaal.

**Waxaanan odhan lahaa:-**

- Dad badan oo lacag haysta ma lihin laakiin waan in aan dhiiri galinaa oo aan taageernaa intaa ayaan kaga baxayaa, waanad mahad san tihiin.

27. **Md. Ibrahim Axmed Haybe:-** Marka hore waxaan Salaamaya Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha, hadaan u soo noqdo sharcigan ina horyaal in badan baa laga hadlay, waxaa aad loo sharxay oo laga hadlay Horumarka waddoyinku u leeyihiin kaaba-yaasha dhaqaalaha oo laf-dhabarta dhaqaalaha iyo daryeelka xoolaha yihiin, isgaadhsiinteenuna waxay ku xidhantahay Waddooyinka, wadanku wuxuu u baahanyahay in Waddoyin Cusubna la dhiso kuwii horena

la hagaajiyo, Somalidu way maah-maahdaa “Xoolo dirqi lama waayo”, waxaynu leenahay oo dhaqan ah qaadhaan lawada bixiyo sida diyadda oo loo eego qoodhoole, lama eego qofka hayntiisa, waa ku khasab inuu bixiyo,

Arrimahaynu ka hadlaynaa Culeys bay leeyihiin iyo malaha maaha, waxaan culeys lahayni ma jiraane baahi baa taala ka weyn culeykeena ee maxaynu ka yeeleynaa? Anigu waxaan leeyahay inaynu takaaliiftan gudbinaa maaha garasho xumo, hadeynu ka hadleyno dantii guud ee qaranka waa lagama maarmaan inaynu xagaajinaa waxna ka qabanaa Xeerkan.

Sidaa awgeed, wixii aynu ka odhanayno takaaliiftan waan ku raacsanahay Xildhibaanada soo jeediyay in Cashuurta Xoolaha ee Gudiddu soo gudbisey la taabto oo waxaan ku raacsanahay Xildhibaankii iga horeeyay in Adhiga 0.50 dollar laga dhigo, Lo’dana $1.5 dollar laga dhigo, Geelana $2 laga dhigo, Marka ay tahay Gaadiidka in lakala saaro oo Gaadiidka yar iyo Gaadiid waaweyn waxa loola jeedo la caddeeyo weeye oo aan soo jeedinayaa.

Waxaa kaloo jirta halka cashuurtu ku hoyaneyso, Cashuurtani waxay ku hoyaneysaa Wasaarada Maaliyada oo Xeerka way ku cadahay sida cashuuraha kaleba ugu hoydaan Wasaarada Maaliyada, Miisaaniyadana way ka muuqanaysaa, waxaan intaa u dhaafayaa, Halkan waxaa ku qoran Gudiyo, Gudi samafal ah xeer laguma soo saaro, waayo qofka samafal u shaqeynayaa inu diido iyo inuu ogolaado xaq buu u leeyahay, Markaa waxaan Xeerka ka saarayaa Qodobada Xeerkan ee Gudidda ka hadlaya oo dhan ee kala ah **Qodobka 7,8,9 iyo 10aad**, Xeerkan cidda ku shaqeyneysa ayaa Gudida sameysaneysa oo Xeer-hoosaad u gaara ah u sameyneysa sidii Gudidii biriijka dhiseysay oo kale inay noqotona waan soo jeedinayaa.

Sidoo kale **Qodobka 11aad** ee hantidhowrka isna waan ka saarayaa, waayo Hantidhowrku Xeer buu leeyahay u banaynaya in Meelkastoo kharash Maaliyadeed dawladu ka waddo inuu awood u leeyahay inuu ogaado, baadh ama daba-galo, sidoo kale waxaan taabanayaa sidii Xildhibaabno iga horeeyay **Qodobka 14aad** waxaan raacasanahay soo jeedintii ahayd in halka laga yidhi Gudidda ayaa dib u eegeysa laga dhigo Golaha oo lagu soo celiyo.

28. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** Marka hore Gudoomiyeyaal iyo Mudanayaal waan idin salaamaya, Salaan ka dib, Xeerkan waxaan u arkaa inuu yahay Xeer muhiima isla markaana Hagaajin waddoyinka ah, waayo dalkani wuxuu soo maray marxalado fara-badan oo marxaladahaasi marba talaabo la soo qaadayay oo wax laga qabanayay.

Waa ilaahay Mahadii hadeynu manta leenahay war waddoyinkii aynu sameysno, halkii hooyadu Magaalada Hargeysa 5ta saacadood ay ku soo gaadheysay ku gaadheyso 2 saacadood, magalada waxaa laga dhisaa waddoyin yar yar dad baa intey wax iska ururiyaan oo markaa lagu sameeyaa.

Waxaan soo jeedinayaa in Xeerka loo bixiyo "Xeerka Horumarinta Qaadhaanka Waddoyinka, sidoo kale yaan lagu soo koobin qaadhaankaa gawaadhida iyo xoolaha, ee wax alaalle wixii dekada ka soo dega in wax loo saaro, sidoo kale dhamaan Wasiirada iyo Xildhibaanada waxaan soo jeedinayaa in bilwalba wax laga jaro, dadweynuhuna iyagaa waddooyinka u baahan, xildhibaanaduna wixii wanaagsan in la diido maaha.

**Markaa waxaan leeyahay:-**

- Madaama Xeerkan lagu sameynayo Waddooyinka qaadhaankaas waa in Cid waliba bixisaa oo halkeeda dhigtaa oo lagawada qeybqaato.

**29. Md. Abuubakar C/raxman Good:-** Xeerkan aynu ka doodeyno ee Takaaliifta Waddooyinka waxaan odhan lahaa ugu horeyn Xeerkan magaciisa ha laga dhigo Xeerka Horumarinta Waddoyinka, tan kale waa inaynu is weydiino ma jirtaa baahi loo qabaa Xeerkan oo waddoyinka la dhiso, waxaa lagama maarmaan ah oo qiime-weyn u leh dalka in la sameeyo Waddooyin.

Hadaan qodobada guda-galo, waxaan qabaa gawaadhidu awood way u leeyihiin lacagtaas inay bixiyaan waayo bishii waxaa ku soo hagaageysa gaadhiga wax ka yar $5, maalintiiba noqoneysana 500 oo shilling, waynu ognahey dhibta waddo la'aantu u leedahay gawaadhida iyo khasaaraha ka soo gaadha markay ceergaabo ka imanayaan iyo markay seylac ka imanayaan, waxaa kaloo ognahay qofka Ceergaabo laga keeno oo ama umusha ah intey ku soo qaadaneyso waddadu.

Markaa Mudanayaal waxaan leeyahay waa ineynu garab istaagno oo taageerno Xeerkan oo ansixino, waayo waa wax dadku baahiweyn u qabo in la helo waddoyin, waa wax inaynu kor u sii qaadno mooye aynaan diidi Karin, markaa waxaan qabaa in adhiga hadii la igu raaco $1 dollar, laga dhigo Xoolaha waaweyna $2.5, Xaga badeecadaha maxay jidadku ka saameynayaan, waxaynu ognahay in jidad hadaanay jirin aana horumar la gaadheyn haday badeecad tahay iyo haday xoolo tahay, manta alaabta yemen iyo itoobiya ayaa ka qiimo jaban kuwa dalka ka soo baxay nasiib-daraduna waa jid xumada.

**Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa:-**

- Waa inaynu si deg-deg ah isu garab taagno horumarka oo si deg-dega ah u ansixinaa Xeerkan.

30. **Md. Cali Obsiiye Diiriye:-** Qodobka 48[aad] ee dastuuku wuxuu leeyahay "Xubinta Golaha Wakiilada uma banana iney qabato Xil kale oo dawladeed, umana banana inay uga faa'ideysato xilkeeda dano gaara, Markaa ha joojiyaan Xubnaha Xilkeeda dano gaara ah uga faa'ideysaneysaa.

Waxaan leeyahay Madaxweynayaasha ha lagu taageero intey xilka hayaan waxa wanaagsan ee ay qabtaan oo soo bandhigaan oo yaan qumanyo lagu noqonin, hadaba dadka u daneeyoy, hadaad dadka u daneyneyso waxaa habooneyd inaad sameyso Xeerkii kala-xadeynta Ganacsiga oo tijaarta waaweyn ee wax soo dejinaya lagu ekeysiiyo Dekeda si ay u wareejiyaan jumladlaha, Jumladlahana lagu ekeysiiyo markuu ku warejiyo ninka bakhaarka ee danyarta ah, halkan ninka tijaarka ah baabuurkii isagaa leh, hadaynu baabuurka joojino bishii wuxuu ka helayaa ninka gaadhiga lihi $15000, markuu maalintii helo $500, ma tijaartad u daneyneysaa, maad xeerkaa u sameyso kaasaa anfacayee.

Dadka u daneeyow, hadaad dadka u daneyneyso waxaad sameysaa Xeerkii kala-xadeynta dhul-beereedka iyo dhul-daaqsimeedka, xoolihii maxay daaqaan meel daaqanba ma jirtee, waxay helayaan meel ay daaqaan oo way naax-naaxayaan aduunkuna wuxuu ku iibsanayaa Miisaanka, Markaa ninka dadka u daneynayaa Xeerkaa ha sameeyo.

In Waddooyinka la sameeyo waa loo baahanyahay, ninka manta leh shisheeyaa ii dhisayow maadan ogeyn in shuruud la inaga dhigayo si wax la inoogu qabto inaynu shirarka Somalia ka qeyb-galno, Somaliland waxay ka dooratey inaynu dalkeena dhisano oo wax qabsano, waxaanu leenahay ma rabno anagaa isku filan oo wax walba qabsanaya.

Ninka umada u deynayaa Xeerkan ha taageero, anigu waxaan leeyahay Waddoyinka Xeebaha ha loo dhaadhiciyo oo hala horumariyo oo kaluunkeynu ka shaqeysan lahayn iyo Milixda dhaqaalahey wax qaban lahayd iyo inamdeenaa tahriibeynaa, ninka leh isgaadhsiinta ha lagu daro ma dad buu u daneynayaa, Cashuurta neefka adhiga ah waxaa lagu qaadayaa Dekada ninka dhoofinayaa waa nin dhergay, laakiin telephonek qofkastaa wuu haystaa dadkii oo dhana wuu taabanayaa.

Waxaan leeyahay, Xeerkan Cidda soo Gudbisey way mahadsanyihiin, waa in Miisaniaydana ka muuqato lacagta la ururinayo oo ay lacagta qaado

Wasaarada Maaliyada, ha noqon ninkii yidhi beesheena saamigeedii Xukuumada wuu ka maqanyahay, sidii ninkii ina cigaal u tagay ee yidhi sooryadii isii, markii la siiyeyna, yidhi inanka ii shaqaalee, markuu u shaqaaleeyana yidhi, Makhaayadan wax ka cunayay igu balami, markaasuu yidhi hadaan sooryadii ku siiyay, inankiina kuu shaqaaleeyay, Maakhayadaa inaga daa, Markaa intuu ordey yidhi war ka kacaay Saamigeenii Xukuumada wuu ka maqanyahaye.

**Waxaan ku soo koobyaaa:-**

- Waa inaynu taageerno Xeerkan oo si deg-dega u ansixinaa umaduu faa'iido u yahaye, waad mahadsantihiin.

31. **Md. Ibraahim Jaamac Cali Reyte: -** Marka hore waxaan salaamayaa Shir-gudoonka iyo Golaha Guud ahaanba, intaa markaan ka imaado runtii Xeerkan in horyaal dhaliilo fara-badan buu leeyahay, waan akhriyay dhaliilaha qaarkoodna akhris uma baahan, dhaliilaha Xeerka waxaa ka mid ah waa qardo-jeex, hab-raacii Xeerarku inoogu iman jireen waa mid baal marsan, wixii cashuur shaqo ku leh waxaa waajiba inay Wasaarada Maaliyada ka soo unkamaan, oo Golaha Wasiiradu markay isla soo gartaan inoo soo gudbiyaan.

Mida kale Xeer marka la unkayo siyaasad buu xambaarsanyahay, waxa laga hadlayaa maaha waddoyin, nina igama jecla dalka tuulo kasta in laami tago, nina ma hor-istaagi karo, waxaa kaliya ee laga hadlayaa waa side wax u qabaneynaa.

Anigu waxaan qabaa marka waddo laga hadlayo intaan Cashuur la gaadhin in la keeno Xeerkii Hay'adda Waddoyinka lagu dhisayay oo halkan lagu sheegay in 15 bilood ka bacdi la keeni doono, wax waliba way kala horeeyaane waxa ugu horeeyaa waa in institutionkii waddoyinka dhisi lahaa lakeeno, in la keeno qiimeynta waddoyinka, waayo waddoyinka waa la qiimeyaa la iska dhisto, waxa lagu qiimeyaa dhaqaalaha ku baxaya.

Waa laga yaabaa in u jeedadu tahay u jeedadii laakiin dariiqu dariiqii maaha, waxaan leeyahay:-

- ✓ Xeerkan Wasaaradii Maaliyada ha lagu celiyo, dalku budget buu leeyahay oo miisaaniyada sidii loogu soo dhiso ayeynu eegaynaa, aduunka lama arag wasaarad budget iska soo sameysata, Budgetku Miisaaniyad buu leeyahay, waa sharci daro in Wasaarada Wasaarada Budget la inoogu keeno, waddoyinku Miisaaniyada Guud baa lagu soo

darayaa oo wax laga siinayaa, hadii Cashuur la kordhinayo meesha ku haboon in lagu kordhiyo weeye, waxaa la saarey Cashuurtan meeshii ugu danbeyn lahay oo ah xoolaha, Xooluhu laf-dhabarta dhaqaalah waddankeena weeye.

- ✓ Xeerkii Hay'adda Waddoyinka ha la keeno, hay'adda waddoyinku waxay ahayd hay'ad dhisan oo independent ah xiligi ina cigaal baa la sameeyay, waxay ahayd hay'ad u dhisan sida nidaamka wadamada kale, dalkan itoobiya waad aragteen waxa waddoyin la dhisey waxay leeyihiin hay'ad madax banana oo cid walba ka kooban oo lala xisaabtami karo, wadama afrika oo dhan waa ceynkaa, garan mayo waxa madaxtooyada loo keenay, waxan aynu ururineyno oo dhan hal mar waxay hay'ad ina siiso, wadda ceergaabo 360 million dollar baa ku baxaysa, waxan oo dhan hadii la ururiyo ma dhiseyso, hadey wasaarada hoos tageyso maxaa Wasaaradii Hawlaha Guud looga saarey.

- ✓ Haddii Cashuur la kordhinayo waxaa jirta Cashuuro badan oo aan la qaadin, cashuuro baaqda baa jira, anigu waan taageersanahay in Miisaaniyada Budgetkeeda la laba-laabo, Cashuurta Isgaadhsiinta lama qaado oo weynu ognahay, Xawaaladdaha Cashuuro lama saaro, Ganacsatada waaweyn lama saaro oo cashuuro badan baa ku baaqda, hadeynu baabuurta cashuureyno dee kuwa yar yar dalka aan waxba ugu fadhiyin ee raaxada ah ayey tahay in la cashuuro oo 3 jibaar la-labalaabo cashuurtooda.

  Laakiin baabuurtii dadka iyo alaabta qaadayey wax loo targetgareeyay anigu garan mayo, waa siyaasad xumo, sidoo kale waa in qaadka la cashuuro oo sigaarka la cashuuro oo lagu kordhiyo.

**Waxaan anigu soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan ha la celiyo oo Wasaarada Maaliyada ha lagu celiyo, haday Xukuumadu Cashuur kordhineyso xaq bey u leedahaye meelaha ku haboon halaga qaado, waa in Waddoyinka Budgetka wax lagaga soo daraa,wax maaliyada ah oo Wasaarada Maaliyada ka baxsan waa sharci-daro, Cashuurtana Qaadka iyo Sigaarka ha la saaro iyo meelaha ku haboon.

32. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, waxaan dhowr erey oo kooban ka odhanayaa Xeerkan, marka

hore waxaan is kortaaagayaa sharci-nimada Xeerkan oo wax dastuurka ka hor-imanayaa muu ku jiraa xeerka:-

Marka hore Mashruuc Sharci qaabka uu golaha ku hor yima waa wax waafaqsan Sharciga oo sharci ahaan waa sax, mashruuc sharci waxaa inoo soo gudbin kara Xukuumada ayaa sharciga ku qoran, xukuumadiina way inoo soo gudbisey.

Nuxurka ah Takaaliifta waa sharci oo nidaamka Maaliyada waa uu waafaqsanyahay, markuu Goluhu ansixiyo ayuuna sharci noqonayaa.

Ujeedadda Xeerku Xambaarsanyahay waxaa:-

- ✓ Mid ka mida horumarinada aynu dalka la hiigsanayno oo ah horumarinta Waddoyinka, hadii aad dastuurka akhridid Caafimaadka, Waxbarashada, Amaanka iyo Waddoyinkuba waa waajibaadka Xukuumada oo xilkeeda, markay inaga in horkeentayna waa wax inagu waajiba inaynu ansixino, hadaad manta dalka eegno wadooyinka jira dadka dhinta, hantida baab'da iyo dadka isku haysta shil-gaadhi waa mashaakilka ay wadda xumadu keento, hantida ku khasaartana aad bay u badan tahay, Xeerkanina wuxuu xalinayaa mushkiladahaa la xidhiidha nafta iyo Maalka.

- ✓ Umadu waxay u baahantahay horumar, si horumar loo helona waa waajib in cashuurta la kordhiyo, mana ah mid mushaakil ku keeneysa haday tahay gawaadhida iyo xoolahaba, markaa maaha wax culeys ku keenaya Bulshada.

- ✓ Arrimaha la xidhiidha lacagta, ma mareysaa nidaam maaliyadeedka aynu leenahay? Haa waa mareysaa oo Xeerka laftigiisa ayay ku cadahay, inagu markeynu takaaliif ahaan u ansixino, ururinteeda, keydinteed iyo kharashgareynteedaba waxay mareysaa nidaamka maaliyda sida Xeerka ka muuqata, the body of law ayay ku cadey sida cashuurtan loo maamulayaa.

- ✓ Waxaa laga hadlay hay'addii waddoyinkii waa la baab'iyey, lama baabi'ine sideedii bay u jirtaa oo Wasaarad baa laga keenay oo Wasaarad baa la hoos keenay, sidaa darted waxaan leeyahay Hay'addii Waddoyinka ee Xeerkan maamulilahaydna Xeerkan ayay ku cadahay oo wuxuu leeyahay 15 bilood gudohood ayaa Golaha horkeenayaa.

- ✓ Qodobka 14aad ee ah in Xeerkan dib u eegis lagu soo Celiyo Gudidda Arrimaha Bulshadana waxaan leeyahay, Gudidu waxay ka mid tahay Golaha, oo lixdii biloodba mar Goluhu dib u-eegis lagu soo celiyo Golaha.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani waa mid ka mida Fursadaha aynu dalka ku horumarineyno, markaa waxaan leeyahay ka dib marka intaa aan sheegay ee Qodobka 14aad wax laga badalo Xeerka Sidiisa ha lagu ansixiyo.

**33. Md:- Maxamed X. Yuusuf Waabeeye:-** Tusaale ahaan Gobolka Daad-madheedh waxaanu soo maray maalin dhoweyd deegaanka Oodweyne iyo Burco waxay dadka Deegaankaas degani ku hawlanaayeen sidii ay wadooyinka ugu uruurin lahaayeen Xoolo waxay marinayeen dhowr kun, taasi waxay ku tusinaysaa in dadka Xoolaha leh ee reer miyiga ahi in ay bixinayaan neef qiimihiisu yahay $90 (sagaashan Dollar) oo ugu deeqayaan wadooyinka maaha markaa 3,000 S.sh sadex kun oo shilin ama $0.5 (nus dollar) mid u diidaya maaha qofka neefkiisii oo sagaashan dollar ah ku deeqay, waxaan aaminsanahay sida halkanba ku qoran in neefka adhiga laga qaado $0.5, Geelana laga qaado $3, Lo'dana laga qaado $3.

Hadii aan usoo yar gundo dego waxaa jira qarankan hanta badan oo waddo xumada kaga lunta maaha mudanayaashu inay xisaabiyaan lacagta iminka lasoo rogay waxaa loo baahanyahay in la xisabiyo lacagta kaga lunta qarankan waddo xumada ama wado dheeraanta, iminka wadada u dhacaysa Hargeysa-Berbera-Burco waa 330KM.

Hadii la sameeyo wadada Hargeysa-Oodweyne-Burco waa 180KM fara u dhexeeyaa waa 150KM, boqol iyo kontonkaa kiiloomitir gaadhiga mara waxaa maalinwalba ku dheeraada hadii uu mari lahaa 180Km 25litir oo shiidaal ah, waxay noqonaysaa markaa $25 hadii ay maalintaa maraan 300 oo gaadhi, waxay noqonaysaa lacag gaadhaysa $7,500 maalintii , bishiina waxay noqonaysaa $2,25000, $3000,000 ayaa shiidaalka oo keliyi noqonayaa marka laga reebo dhaman kharashaadka kale waxay noqonaysaa in lacag $10,000,000 dalkan ay sanad walba kaga baxdo wado xumo.

markaa maaha mudanayaashu inay xooga saaraan maanta cashuurta la saaray laakiin waxa ay tahay inay xisaabiyaan tobanaanka million iyo inta ka badan ee kaga lumaysa wado xumada waxaan la qabaa mudanayaashii soo

jeediyey **Qodobka 14aad** in lix bilood kadib marka uu Madaxweynuhu sexeexo Guddida Arimaha Bulshadu ay dib u eegis ku samayso, waxaan la qabaa inay Golaha Wakiiladu ay la eegaan.

**34. Md. Maxamed X. Maxamuud Cumar Xaashi:-** Waxaa weeye Xeerkan in badan ayaa iminka laga doodayey, Xeerkan waxaa sida shaqadu tahay ee Xeer hoosaadkeena ku qoran lahayd Guddida Dhaqaalaha mar hadii Taakaaliif iyo Cashuuri soo gasho oo laga hadlayo, markaan anigu u sheegay Shir guddoonka way ka cudur taarteen waxaanay sheegeen in khalad dhacay ahayd taasina wax loo kasay may ahayn ee waa wax ku yimid khalad, taasna waxaan uga hadlayaa waxaan ku arkay saxaafada markaa waxaan leeyahay khalad dhacay ayuunbuu ahaa.

Ta labaad, waxaa weeye layskuma hayo inaynu u baahanahay waddoyin, waddo la'aani waata halkaa ina dhigtay, hadaad meel walba soo qaadato min bari ilaa galbeed waddoyin keenu aad bay u liitaan waddaduna inay tahay kaabaha dhaqaalaha koowaad ee wax badan fududayn kara oo maanta hadii wado jirto waxbadan ayaa fududaan lahaa, markaa waxaan leeyahay horta yaan marnaba lagu talax tegin oo la odhan ma loobaahanyahay waddo waa loo baahanyahay cidina ma diidana, laakiin baahida markaynu ka tagno waxaynu odhonaynaa side ugu fiican ee loo samayn karaa wadooyin?

Uruurinta Cashuurtu had iyo goor dadkeenu uma jajabna inay cashuurta bixiyaan waxaynu ognahay hadii iminka aad halkaa is taagto oo wadada istaagto oo aad eegto inta gaadhi ee bixisay Cashuurta wado marida inay aad uga yartahay kala badhoo badh, taasi waxay ku tusinaysaa inay Cashuurtu adagtahay Ururinteedu hadii iminka xitaa aynu ku dayno oo gawaadhida halkan taala eegno waxaan arkaynaa in badan oo aan bixin Cashuurta iskadaa kuwii shicibka e kuwii Xildhibaanada ayaan qaar badan lahayn Cashuurtii wado marista.

Cashuurtu waa inay noqotaa wax is daboola oo ayna ka badnayn kharashkeena, Cashuurta iminka lasoo jeediyey ta Xoolaha maahee ta Baabuuradu waxay noqonaysaa midaan loo tag helayn waayo tii hore sadex goor ayaa la laban laabay ninka tii hore bixin waayeyna tana bixin mayo Cashuurtu waxay u baahantahay daraasad oo waa inaad ogaataa Cashuurta sida loo bixiyo, hadii aanad kaba war hayn waxay noqonaysaa Cashuurtaasi in aynu inaguna nidhaahno Cashuurtaasi waa la uruuriyey qoladii wado maristuna tidhaahdo mahayno, oo inaguna nidhaahno waataasoo Cashuurtii waa la cunayaa waayo dalka aynu joognaa waa dal faqiira.

Cashuurtan iminka lasoo jeediyey waxaan qabaa inaan daraasad lagu samayn inaan wakhtigeeda la siin oo la dersin, Xoolaha intii xukuumadan Kulmiye haysay hoos baa loo dhigay, hadana maaha intii aan hoos u dhigay ayaan dib ugu celinayaa taas yeeli mayno, waxaan ku yar noqonayaa taariikhda SRA (Somaliland Road Authority) berigii la sameeyey waxaa loo sameeyey inay madax banaanaato waxay dawladii Cigaal SRA waxay lahayd laba Chairman oo midina yahay SRA da midina yahay FSRA da ninka ugu dareeya ee Gudoomiyahau ah,

Chairman ka kalena wuxuu ka tirsanaa UNDP da macnaheedu waxay ahayd markaad 25 keentan Hay'adaha caalamiga ahina waxay idiinku darayaan 75 waa wixii ay usoo baxday fee yadii ugu horeeyey ee la qaadi jirey taas ayay ahayd, waxaa dhacday in madax banaanidii laga qaado markii uu yimid Madaxweyne Riyaal oo la hoos geeyo Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka iyo Guriyaynta waxay ku wanaagsantahay oo halkan laga soo jeediyey oo la leeyay sanad iyo dheeraad ha keenaan sharcigoodii dee iyaguba hada diyaar garoobe e in sharcigii keenaan oo laysku dayo in la madax banaaneeyo haba hoos timaado Wasaarad.

Waxaa ujeedadu tahay markaa halka ugu badan Cashuurta marka la eegayo waxaa la odhanayaa Cashuurta maxaynu uga dan leenahay, Cashuurtan waxaynu uga danleenahay dhismo degdega ah oo aynu ku doonayno wadooyin aan haruumar ku gaadhno, dee waxaa laga qaada meesha uu kasoo baxaayo ee yaan laga qaadin meelo aanu kasoo baxayn, waxaa aynu maanta wada garanaynaa baakidhka Sigaara 1,500 S.Sh ayaa laynaga siiyaa dunida meel 1500 sigaar la siisan karaa ma jirto waa 25 cent , inagoo waxbadanba saarin hadii aad saarto waxaa kuusoo baxaya lacagta iminka la xisaabinayo lacag aad uga badan oo aan cidna waxba yeelayn, waxaynoqonaysaa markaa Gudoomiye labadaa Ra'yi inaan soo dhexdhexaadiyo.

Waynu ogolahay wadooyinka in la dhiso waana wanaagsantahay waana aynu u baahanahay waxaan odhanlahaa: aynu ka balan qaadno hadaynu Golaha nahay inaynu la shaqayno oo daraasad la sameeyo oo daraasadaasi in meesha wax kasoo baxayaan inaynu saarno oo weliba kula dadaalo qolada qadooyinka inaguna aynu ku dadaalo inaynu Miisaaniyada gelino laakiin ay tahay sidan ay iminka u eegtahay inaan wax badani kasoo baxayn taas xoolaha waa laga yaabaa laakiinse ta gawaadhidu aadbay u adagtahay intaan anigu garanayo waa markaa waxaan soo jeedinayaa in meesha wax kasoo baxayaan laga raadiyo sida waxyaabah faahkihaysiga ee Qaadka, Sigaarka cosmatecs.

**waxaan leeyahay:-**

- Xeerkan sidiidaba hala Celiyo oo aynu isla kaashano waynu ognahay oo madaxtooyada cidina ma baadho hanti dhawre ma baadho markaa runta waa inaan isu sheegnaa.

**35. Md. Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle:-** Dooda infrastructutrkani waa dood aad u dheer oo mudo badana Golaha hortaaley in badana taalay weeyaan oo dhinacyo badan ba galaysaa haday tahay dhinaca infrastructure ka, dhaqaalaha, haday tahay dhinaca wadoonyinka, haday tahay cashuuraha, haday tahay budget ka haday tahay Gobolada, haday tahay dadweynahay dibada iyo Guddaha iyo wax soo saarka dalka haday doodan is nidhaa ka dooda waa dood aad u balaadhan oo aan laga dabaalan Karin weeyaan lakiin waxaan ku dadaalayaa in aan soo koobo.

Hadii aan sookobo waxaan is leeyahay waxay u qaysantaa laba qaybood oo kala ah

- Cashuurta la saaray neefka Xoolaha ah
- Iyo dhismaha wadooyinka

Hadaba aan ku horeeyo neefka xoolaha ah cashuurta la saaray iyo inay culays ku tahay taa ianaga oo ka duulayna marka hore oo ilaahay inagu manaystay oo ay ka mid tahay macdanta, shidaalka oo wadamada jaarka aan nahay wax aynu dheernahay tahay ayaa waxaa is waydiin leh qiimaynta neefka cost of production ka waa in aan eegnaa marka aan eegno qiimaha uu ku taagan yahay ninka xoolaha dhaqaya ka keenaya oo aanay wax badani kaga bixin oo cost of production kiisu yahay Zero, tusaale ahaan qofka xoolo kaana isagu uu leeyahay waxaa loo gushubaa neefkiiba 80 dollar

Sixirkii ugu danbeeyay ee uu marayay neefka adhiga ahi waxa uu ahaa 84 dollar waa ka ugu badan ka ugu yarina waa 79 dollar markaa 48 hours ayuu joogaa maxjarka oo lagu daweeyo lagu dhaqaaleeyo cuntadiisa iyo cabitaankiisaba, carafadii dhawayd neefka adhiga ahi waxaa uu gaadhay 150 dollar korintiisa ilaa la keenayo ilaa saylada iyada oo laga qaado hadana dhismayaasha kaabayaasha dhaqaalaga hadii cashuur lo saaro ma qaadi karaa ayaa meesha taala anuu waxaan aaminsanahay in uu durduro ku qaadi karaa 0.5, 1, 2, dollar ayaan aamin sanahay.

Markaa ilama aha in ay caqabad ku tahay islaantii iyo odaygii soo dhaqay neefkan eek u raaci jirtay miyiga cashuuri maraacayso ayaan aamin sanahay

ee waxay cashuurtaasi raacaysaa ninka carbeed iyo dakaa iibsanaya, markaa waxaan leeyahay waxaay cashuurtaasi culays badan kuma hayso ayaan leeyahay.

Hadii aan u imaado xaga dhismaha wadooyin ka dalku waa uu kala xidh xidhan yahay gaar ahaan gobolka sanaad waa go'doon anoo ah xildhibaanada laga soo doorto Gobolka sanaag, gobolkaas oo ah 38% wadanka marka la eego waana gobol Beero, Xoolo, Kaluun, Xabag oo aan qaarkeed aduunakba laga helin aduunka inteeda kala laga helin ayuu leeyahay oo ka bilaabanta fleenka, Moxogaka, Maydika, Mujawadka, mushaadka, waa marwuush, hadaad oo hoos u soo degto sida Malmalka feleebka, Murkud, xabag hadi ayaa jirta, xabag cadaaded baa jirta, jiiqbaa jirta, ceeryaan baa jirta, foox ayaa jira waxaa kale oo jira malabkii iyo subagii waxaas oo dhan khayraada ayaa jira markaa dalka intiisa kale oo dhan go'doon ayuu kaga jiraa.

Tusaale ahaan sida ay wadooyinku u wanaag san yihiin hadaa soo qaato anoo jooga wajaale ayaa waxaan la kulmay 4 tareenle oo xadka Somaliland jooga markaas ayaan waraystay dirawalkii waxaa uu ii sheegay inuu ka yimi Mambasa oo ay wadaan soor la shiiday oo ay u wadaan boosaaso oo waayahee Ethiopia, Somaliland, Somalia intaas oo dhan maxaad u soo dhaafiseen waxaana uu ii sheegay in ay usoo dhaafiyeen laba shay oo kala ah nabadgalyada iyo wadooyinka dalkeena waxaa kala go'doomiyay waa wado la aan oo qofkii mar maraa aanu hawaysan mar labaad dadkii ay ka soo guureen oo ay u dangan yihiin Hargaisa wado la'aan awgeed.

Markaa waxaan odhan lahaa nimcada ceegaalta gobolkaa sanaag somalilad waa ka qatan tahay isna waa ka qatan yahay isaga oo dalka ugu qanisan ayaa hadana uu yahay qobolka ugu fiqiirsan weeyaan markaa waan taageerayaa cidkasta oo u soo tafo xaytay madaxweynaha jamhuuriyada Somaliland wanan ku taakeerayaa arinkaa waxaan leeyahay hadii aad salad tuakanayso waa in uu kuu muuqdaa imaamka ku tujinayaa waxaan uga jeedaa ceerigaabo Hargeisa ma aragto Burcana ma aragto oo halkaa ayay wadadu ugu go'day.

**Sidaa daraadeed:-**

- Waxay baahan tahay wax ku soo xidha jamhuuriyada Somaliland waanad mahad san tihiin.

36. **Md Ibraahim Caraale Cabdi:-** Waxaan marka hore salaamayaa dhamaan shirgudoonka xildhibaana iyo saxaafadaba waan salaamayaa, xeerkanu waxaa uu socday waxaan filayaa in ay tahay maalintii 4 aad intiisii mihiimka

ahaydna waa la wada sheegay lakiin waxaan ku darayaa in yar oo aan is leeayay waa mihiim ama in aan sileeyahay waxy xoojinayaa intii hore.

Waxaan leeyahay wadanka horumarkiisa waxaa la eegaa waa wadooyinka hadii uu dalkaasi wadooyinku horumarsan yihiin waxaa uu cabiranayaa labashay oo kala, wadankaasi waxaa uu leeyahay dhaqaale iyo wadan nabad galyo ah labadaas na waan u baahanahay wanan u baahanahay, waxaa in badan la is waydiiyay ma u baahanahay in wadooyinka la horumariyo? Anuu su'aashaa waxaan isu waydiiyay si kale oo ah dhib intee leeg ayay ingu haysaa wado xumadu?Anigoo ah xildhibaanada laga soo doortay Sanaag waana Gobolka aya wado xumo ragaadisay ayayna u dhinteen wado xumo, waxaana Goboladan kale kaga horumarsan yihiin gobolkaa sanaag waa kobkobka ama wadadaa aan ka dhaxalnay gumaystii.

Waxaan leeyahay anuu hadaanad libinba aanad isu dayin libintii la heli maayo ee waxa yare e la soo jeediayay labada meeloodna lasaaray waxa ay yeelaysaa ma jirto dhinad kale markaan ka eego cashuurta la saaray maalintii 500 sh/l wax ay yeelaysaa ma jiro waana u faa'iido ayaan leeyahay baabuurka waaweyni waa 1500 sh/l waana mid aan dhib u keenayn dhibtaana waa in laga gigishaa oo loo kacaa mana haboona in laga dhigo wax aan wax tarayn ee waa in aan ka eegnaa xaga wanaagsan aan ka tusno sidaa ayaa ila haboon waxaana soo jeedinayaa laba arimood

- Marka hore waxaan taageerayaa in xeerka la ansixiyo oo sida ay gudiddu soo gudbisay lagu ansixiyo
- Waxaa kale soo jeedinayaa xukuumada u tafo xadatay horumarinta wadooyinka yaan wixii yaraa ee hore lagu darin in lagu bilaabo wadadaa ceerigaabo ee go'doonka ku jira halugu bilaabo ayaan soo jeedin lahaa ama laamay halaga dhigo ama caratuulba halaga dhigaa waa wax tar ayaan leeyahay.

Waxaa kale oo aan carabka ku adkaynayaa marka aan ka hadlayno Gaadiidka iyo adhiga waxa ku noqonaya ayaa kabadan waxa laga qaadayo waxaan kale oo aan baraajuniyaa oo aan taageerayaa neefka xoolaha waxa aan saarnaa waxaa uu fuulayaa qofka inaga iibsanaya hadii aan saarno bariiska waxay fuulaysaa masaakiinta danyarta.Waxaa kale oo aan taageerayaa xeerka dib u eegistiisana waan taageerayaa waxaanan leeyahay 6 bilood kuma filna ee waxaan odhan lahaa sida xidhibaano iga horeeyay ay soo saareen in laga dhigo sanad markaana dib loo eego sida uu u shaqeeyay intaa ayaanku soo gabagabaynayaa.

37. **Md. Xasan Muuse Hufane:-** Waxaan marka hore salaamayaa dhamaan shirgudoonka xildhibaana, shaqaalahaba iyo saxaafadaba waan salaamayaa,

Xeerkanu waa mid mihiim markaa aan wadooyin dhisanayno xagee ayaa laga soo saarayaa ayaa is weydiin mudan ma waxaya la saarayaa masaakiinta mise waxaa la saarayaa shirkadaha waaweyn sida uu sheegayo Qodobkiisa 4aad xeerkan waxaa lagu dabaqayaa Damaanka iyo Gaadiidaka ku xusan qodobka 1aad ayuu xusay waxaa uu saaray wax allaale wixii wadooyinlagu samayn laha markaa hadii aan laba u kala qaado gaadiidka waxaa jira basas yaryar oo dadka qaada ayaa ku jira waxaa uu qaadaa maalintii mar kaliya ayuu baxaa oo masariis ka sugaya ninka leh, dirawalka, iyo kirishbayga waxaana looga reebay kirishbaygii kharash la'aan markaa waxaan leeyahay maqaadi karaan 95 000 kun s/sh/l waxaan u baantahay in dadka la waraysto oo la dhexgalo waxaana soo jeedinayaa in laga dhigo 75 000 s/sh/l .

Baabuuta waaweyn waxay soo qaadaan allaabada lasoo dajiyo waad ogtihiinoo ganacsatadii waaweynayd mid kastaa waxaa uu leeyahay gaadhi uu ku soo gurto alaabadiisa waxanan leeyahay maba helaan wax ay soo qaadaan waxanay qaadaan labadii biloodba mar ayay qaadaan ama maba helaan oo lacagtaasi way ku soconaysaa mana karayaan ayaan qabaa waxanan soo jeedin lahaa halka ay ka tahay 390 kun In laga dhigo 300 ku ayaan soo jeedin lahaa.

Ta ah neefka xoolaaha cashuurta la saaray xoolaheenu waxay ku jiraan tartan marka la geeyo sayladaha dalalka aan u dhoofino xoolaha waa inuu la tartami karaa qiimaha saarana waa in la dhimaa ayaan taageerayaa oo sidii xildhibaanadii hore soo jeediyeen ayaan taageerayaa ee ahaa in laga dhimo

**Waxaana aaminsanahay:-**

- In cashuurta la saaro shirkadaha iyo waxyaaba aan faa'iidada aan lahay xeerkana dib ha loogu noqo oo hala hagaajiyo ayaan soo jeedin lahaa waanad mahad santihiin.

38. **Md. Cabdiraxmaan Muuse Jaamac:-** Waxaan marka hore salaamayaa dhamaan shirgudoonka xildhibaana iyo saxaafadaba, hadii qoladii Ceerigaabo ka sheekaysa wada ana waxaan ka sheekaynayaa wadada laas caanood iyo caynaba oo aan cid u hadashay aanay jirin wadooyinkaa hala hagaajiyo ayaan leeyahay waayo waa mid aad loogu baahan yahay waxaana taageerayaa in adhiga la saaro 0.5 taas oo aan uga baqayo in ay xoolaheenu u wareegaan meelo kale.

Takale ee gaadiidka ma shqeeyaan ee waxaan qabaa in aan la saarin gaadiidka ayaan leeyahay hana loo badalo meelaha kale ee ay an soo xusnay ee ay xildhibaanadu soo sheegeen ayaan soo jeedin lahaa.

**Waxaa aan soo jeedin lahaa:-**

- In Guddi loo saaro waayo dooda xerkan oo aad u dheer ayaan u soo jeedinayaa in gudidaasi soo habayso oo ay soo qurxiyaan xeerkan si uu inona leh ayaan soo jeedin lahaa intaaayaan soo jeedin lahaa.

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
|---|---|
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| -------------------------------------------------- | ------------------------------------------ |